بسم الله الرحمن الرحيم

**Barnaamijka Xisbiga UCID**

Ee Doorashada Madaxtooyada 2017



**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**Xisbiga Cadaaladda Iyo Daryeelka**

**UCID**

**Justice and Welfare Party**

**حزب العداله والرأفة**

**Tusmo (Table of Contents)**

## Tusmo Page

**Tusmo (Table of Contents)** ........ **II**
**FARRIINTA MUSHARRAXA MADAXWEYNAHA AHNA GUDDOOMIYAHA XISBIGA** ....... **V**

**CUTTUBKA KOOWAAD: MAAMUL WAANAGGA** ........ **1**
Dhisidda dawlad kooban oo tayo leh ........ 1
Dib u habaynta hay'adaha xukuumiga ah ........ 2
Aburidda hay'ado cusubi yo xoojinta kuwii hore u jiray ........ 2
Guddida culimida (Islamic Council) ........ 3
Hay'adda Marsooyinka Qaranka (National Port Authority) ........ 3
Guddida kormeerka Dawladda (Public Monitoring Committee) ........ 3
Guddida dhaqaalaha qaranka (National Economic Council) ........ 3
Ururada bulshada rayidka ah (Non State Actors) ........ 4
Golaha Guurtida ........ 4
Hay'adaha kale ee Xukuumadda UCID dib u habayn iyo dib dhis ku samayn doono ........ 5

**CUTTUBKA LABAAD: SUGIDDA CADDAALADDA DALKA** ........ **6**
Maxkamado Caddaalad ku Dhisan ........ 7
Tayaynta Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ........ 9
Sugidda Xuquuqda Dadka ........ 9

**CUTTUBKA SADDEXAAD: CIIDAMADA DALKA IYO KOBCINTA AMMAANKA** .. **10**
Ciidanka Qaranka ........ 10
Ciidanka Booliska ........ 11
Ciidanka Asluubta ........ 11
Ciidanka Sirdoonka iyo Socdaalka ........ 12

Adkaynta nabadda iyo amniga ........ 12

**CUTTUBKA AFRAAD: DHAQAALAHA ........ 13**
Kor-u-qaadista wax sosaarka aasaasiga ah (Primary Produce Production) ........ 14
Kalluunka, Khayraadka Badda iyo Barriga ........ 15
Biyaha iyo Macdanaha Dalka ........ 16
Xoolaha iyo Beeraha ........ 16
Nidaaminta iyo Xoojinta Bangiga Dhexe ........ 18
Aasaaska Guddida Dhaqaalaha Qaranka ........ 19
Shaqa-abuuris ........ 19
Kobcinta Sanduuqa Sakada ........ 20
Tayaynta Hay'adda Shaqaalaha Qaranka ........ 20
La dagaalanka Musuqmaasuqa (Zero-Tolerance Corruption Policy) ........ 21
Dib-u-habaynta Nidaamka Cashuuraha Dalka ........ 21
Horumarinta Dalxiisa ........ 22

**CUTTUBKA SHANAAD: CAAFIMAADKA ........ 23**
Caafimaadka Xoolaha ........ 26
Ilaalinta Tayada Badeecadaha ........ 27
Xoojinta Tayada Waaxda Fayadhawrka iyo Nadaafadda ........ 27

**CUTUBKA LIXAAD: WAXBARASHADA ........ 28**
Wax-ka-beddelka iyo kaabidda nidaamka waxbarasho ee dalka ........ 29
Nidaaminta Hay'adaha Waxbarasho ee dalka ........ 29

**CUTUBKA TODDOBAAD: DAWLADAHA HOOSE, CAASMIDDA IYO DHULKA ........ 31**
Dawladaha hoose ........ 31
Maamul daadejinta ........ 31
Caasimadda ........ 32
Dhulka ........ 32

**CUTUBKA SIDDEEDAAD: ADEEGGA BULSHADA (SOCIAL SEVICES) ........ 33**

SIYAASADDA BIYAHA EE XISBIGA UCID ........................................................................ 33
SIYAASADDA KORONTADA EE XISBIGA UCID............................................................... 33
DARYEELKA BULSHADA.................................................................................................. 33
Daryeelka Naafada, Agoomaha iyo Dadka Da’da ah ................................................................ 33
Horumarinta Dhallinyarada (Gabdho iyo Wiilal) ..................................................................... 34
Kobcinta iyo Daryeelka Haweenka JSL........................................................................... 35
Daryeelka iyo Horumarinta Dadka la Haybsooco..................................................................... 36
**CUTUBKA SAGAALAAD: SIYAASADDA ARRIMAHA DIBADDA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA AH ........................................................................................................ 38**
**CUTUBKA TOBNAAD: SIYAASADDA DEEGAANKA IYO DALXIISKA...................... 40**
**CUTUBKA KOW IYO TOBNAAAD: SIYAASADDA ARRIMAHA SAXAAFADDA...... 42**

**FARRIINTA MUSHARRAXA MADAXWEYNAHA AHNA GUDDOOMIYAHA XISBIGA**

“Soo dhawoow, gacmo furan ku soo dhawoow mudane/marwo.

Farxad weyn bay ii tahay in Somaliland maanta gelayso doorashadii lixaad ee si dimuquraadi ah ay madaxdeeda u soo doorato; Wakiillo, golle-deegaan iyo madaxweyne intaba. Farxad weyn bay ii tahay in aad maanta gacanta ku hayso barnaamijka kali ah eel eh aragti siyaasadeed uu ka duulayo, oo uu leeyahay xisbiga keli ah ee leh aragti siyaasadeed uu ku dhisanyahay.

Xisbiga UCID waa xisbiga keli ah ee ilaa maalintii la aasaasay u taagan aragti siyaasadeedka (socialist-bulshaawinnimada) taas oo barnaamijkiisuna ku salaysanyahay isla argatidaas. Waa aragtida la daggaalanka kala sarreynta iyo dabaqadaha, waa aragtida u sinnaanta xuquuqda aasaasiga ah, waa aragtida ummaddeena ka saari karta kala qoqobnaanta. UCID waa xisbiga ugu da’ weyn saddexda xisbi qaran uguna waayo-aragsan, UCID waa xisbiga maanta ka badbaadin kara dalkani in uu galo cunfi qabyaaladeed isla markaana u horseedi doona horumar iyo badhaadhe.

Waxa aan kuu ballanqaadayaa in xukuumadaydu sameyn doonto isbadal weyn oo qaran iyo bulsho. Waxa aan uu ku dhaqaaqidoonaa in aan gunta ka jaro hab dhaqankii iyo maamulkii ku dhisnaa musqmaasuqa ,cadaalada darada, kala-dambayn la’aanta. Waxa ay xukuumaddaydu ka shaqeyndoontaa bulsho iimaan iyo aqoon leh kuna abtirsata diinta islaamka iyo sunihii nabigeen suuban (SCW). Wuxuu xisbigu u taaganyahay sidii Somaliland looga hirgalin lahaa dawlada casri ah oo ku dhisan sharci iyo nidaam dimuquraadi ah dadkuna u simanyahay sida ay ugu simanyihiin ILAAHAY hortii iyo sharciga hortiisaba(rule of law). Dawlada ku dhisan nidaam, sharci, kale danbeyn iyo hay’addo, bulsha wax u cunta inay noolato oo aan u nooleyn iney wax cunto “society that teas to live, but not lives tea”.

Muwaadin waxa uu xil kaa saaranyahay doorashada hoggaanka 5ta sanno ee soo socota adiga oo tixgelinaya kartida, aragtida, aqoonta iyo sooyaalka tartameyaasha, isla markaana ku go’aan qaadanaya barnaamijyada siyaasadeed. Marna ha igu dooran qabyaalad, cid kale ha ku dooran qabyaalad. Igu dooro qorhse, igu dooro badbaadin, igu dooro in aan mustaqbalkaaga iyo mustaqbalka ubadkaaga ka dhigo mid ifaya. Igu dooro in aan ka dhigo Somaliland meel lagu soo hirto oo aan laga hayaamin. Maanta ayaad go’aan leedahay.

Mahadsanid.”

Musharraxa Madaxweyne ee Xisbiga UCID
Eng. Faysal Cali Waraabe

## CUTTUBKA KOOWAAD: MAAMUL WAANAGGA

Hoggaanku waa waxyaalaha ugu muhiimsan ee looga baahanyahay Somaliland. Xisbiga UCID waxa uu aaminsanyahay in dhibaatada ugu weyn ee maanta Somaliland Haysataa tahay hoggaan xumo. Dhibaatadani waa mid soo taxnayd ilaa maalintii Somaliland Xorriyadda qaadatay, 1960kii. UCID waxay ballanqaaday in amuurtaas wax ka baddesho. Si loo helo maamul wanaagna, UCID waxa ay la imanaysaa hoggaamin han iyo himilo leh; hoggaamin ku tamarisa argti dheer, daacadnimo iyo Alle ka cabsi.

Xisbiga UCID waxaa u hirgelin doonaa maamul wanaag iyo isxukun casriya, dimiquraadiya isla markaana ku saleysan qiyamkeena iyo horumarka dalku hiigsanayo, waxa aanu u aqoonsanaynaa 10ka sannadood ee soo socda 2017-2027, 10ka sannadood ee horumarka iyo barwaaqeynta jamhuuriyadda Somaliland.

### Dhisidda dawlad kooban oo tayo leh

Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa oo ka go'an dhisidda dawlad kooban islamarkaana tayo leh. Tirada wasiirrada xukuumadda UCID waxa noqon doonaan inta u dhexeysa 13-16. Wasiirrada aannu xilka u dhiibaynaa waxay isugu jiri doonaan rag iyo haween.

Waxa aannu ku xulan doonnaa madaxda dawladda astaamahan hoos ku qoran:

1. Aqoon sare oo uu qofku ku hanan karo xilka loo igmaday
2. Aqoon diineed, Alle ka cabsi iyo daacadnimo
3. Waddaniyad iyo aragti-ummadeed
4. Qof ka nadiif ah musuqmaasuq, caddaalad darro, qabyaalada iyo karti darro iyo in uu hanqal taagin hantida ummadda ka dhaxaysa
5. Waayo-aragnimo

Xukuumadda Xisbiga UCID waxa ay noqon doontaa mid isku dheellitiran oo fursad siinaysa dhammaan qaybaha bulshadu ka koobantahay (an Inclusive government); waxa aannu

ballanqaadaynaa in dhallinyarada, haweenka, bulshada la haybsooco, naafada, iyo dhammaan deegannada soomaliland ka koobantahay ba saamigooda si siman loo tixgelin doono.

Xukuumadda UCID waxa ay noqon doontaa mid maamul daadegsan leh oo qof kastaa doorkiisa ku habboonaa leeyahay. Xafiiska madaxweyne ku xigeenka xukuumaddu waxa uu noqon doonaa mid kaalin iyo door weyn leh, isla markaana ay hoos yimaaddaan hay'ado badan iyadoo laga faa'idaysanayo dastuurka qaranka qodobka 91aad, farqaddiisa 2aad.

Si loo helo madax iyo hawlwadeenno isla jaanqaadaya oo aqoon ahaan dhisan, xisbiga UCID waxa uu ballanqaadaya inuu tayeyn, daryeel iyo tababar u geysan doono shaqaalaha si ugu fududaato in ay gutaan waajibaadka isla markaan ka midho dhaliyaan yoolka hawlaha horumarineed ee laga sugayo.

**Dib u habaynta hay'adaha xukuumiga ah**

UCID waxa ka go'an oo ay ballanqaadeysaa dib u habaynta, tayeynta, iyo casriyeynta hab-maamulka iyo adeegga hay'adaha xukuumadda sida wasaaradaha, hayada'aha qaranka. Si looga midho dhaliyo arrintaas waxa aannu ku dhaqaaqi doonnaa dhisidda qaaabdhismeed xukumiya kaas oo ah mid isgaadhsiisan, waafaqsan qorshaha horumarineed ee UCID isla markaana uu qaadi karo dhaqaalaha kooban ee dalku.

**Aburidda hay'ado cusubi yo xoojinta kuwii hore u jiray**

Xisbiga UCID isaga oo ogsoon

1. Muhiimadda ay hay'adaha qaarkood u leeyihiin tayada dawladnimo iyo adeegga bulshada,
2. Tayo darnaanta hay'adahaas intooda haatan dhisan haysata,
3. Maqnaanshaha hay'ado badan oo lama huraan ah iyo
4. Jiritaanka hay'ado ama guddiyo aan wax dan ahi ugu jirn ummadda, isla markaan dulsaar ku ah dalka oo maamulladii kala dambeeyay sameeyeen, ayaa uu xisbiga UCID go'aansadey in marka uu talada qabto aasaaso hay'ado cusub isla markaana xoojiyo kuwii hore u jirey, hay'adaha la sameyn doono iyo kuwa la xoojin doono waxaa ka mid ah

**Guddida culimida (Islamic Council)**

Waxa aannu sameyn doonaa guddida culmida annaga oo ka duulayna distoorka qaranka qodobbadiisa 115aad ilaa 121aad, guddidani waxa ay gudan doontaa waajibaadka dastuurku qeexey, isla markaana waxa ay iswaafajin doontaa xeerarka dalka iyo shareecada islaamka.

**Hay'adda Marsooyinka Qaranka (National Port Authority)**

Waxa aannu sameyn doonaa hay'ad xilkeedu yahay horumarinta dekedaha dalka taas oo waajibaadkeeda, yoolkeeda iyo hiigsigeedaba si cad loo qeexi doono.

Hay'adani waxa ay u guntan doontaa sidii loo horumarin lahaa dhammaan meelaha dalku wax ka dhoofiyo, waxna kala soo dego, sida dekedaha, madarrada dalka iyada oo dhinca kale la horumarin doono isgaadhsiinta casriga ah si dalku u noqdo marso muhiima oo ganacsi oo bariga afrika ka dhex muuqata (East Africa commercial gateway).

**Guddida kormeerka Dawladda (Public Monitoring Committee)**

Waxa aannu sameyn doonaa guddi kormeer (Public Monitoring Committee) oo madax banaan. Guddidadni waxay noqon doonaan xubno bulshada ka tirsan oo ka kooban aqoonyahano xul ah.

Guddidu waxay dusha kala socon doontaa tayada waxqabad iyo kartida wasaaradaha, waxaaney soo saari doontaa warbixin sannadeed (Annual Report) ku saabsan shaqada iyo habdhaqanka wasaaradaha, haya'daha dalka iyo wasiirrada dawladda iyaga oo isla markaana soo jeedin doona talooyin iyo tallaabooyin ku habboon. Waxaana waajib ku noqon doonta xukuumadda UCID in ay ku dhaqanto talooyinka guddida isla markaana ka qaaddo tallaaboyinka ku habboon madaxda warbixintu tilmaanto waxtar la'aan tooda, caddaalad darradooda. Xilka guddida oo qeexan waxa faafhfaahin doona xeer.

**Guddida dhaqaalaha qaranka (National Economic Council)**

Waxa aannu dhiseynaa guddi dhaqaale oo xul ah isla markaana ku qalabeysan aqoon sare iyo dhaqaale iyo xogo rasmiya oo ay ku duulaan. Guddidani waxay qabanayaan hawlo ay ka mid yihiin kuwa hoos ku qoran

- Guddidu waxa ay eegayaan in dhaqaaleha waddanku ku socdo istiraatijiyaddii xisbigu u dejiyey si lo helo koboc dhaqaale

- Guddidu waxa ay eegayaan isla markaana dersayaa gol daloolooyinka ku yimaadda hayadaha dhaqaalaha iyo dhibaatoyinka soo wajaha dhaqaalaha
- Guddidu waxa ay ka shaqeynayaan tayeynta haya'adaha dhaqaalaha dalka, isla markaana waxay guddidu hubineysaa in shaqaalaha ku hawllan dhaqaalaha dalku leeyihiin tabobarkii iyo khibraddii loo bahnaa.
- Hawlaha guddida oo faahfaahsan waxa qeexi doona xeer lagu lifaaqo aasaasidda guddidan.

**Ururada bulshada rayidka ah (Non State Actors)**

Xisbiga UCID waxa uu muhiimad siinayaa doorka urrada aan dawliga ahayn ku leeyihiin dib u dhiska waddanka dhinaca walba, dhaqaalaha, xuquuqul insaanska, cilmibaadhista, kobcinta aqoonta iyo xoojinta doorka haweenka iyo dhallinyarada.

Xisbiga UCID waxa uu u arkaa ururada bulshada rayidka ah mid kamid ah tiirarka dawladnimo ee dalku ku dhisanyahay. Sidaas daaraaddeed, xisbiga UCID waxa uu tixgalin mudan siin doonaa xoojint iyo taageerada ururadaasi yo qorshayaasha ay la yimaaddaan.

Xukuumadda UCID waxa ay wadashaqeyn dhow la yeelan doontaa ururrada maxalliga ah kuwa caalamiga ah, sidoo kale xukuumadda UCID waxa ay fari doontaa dhammaan ururradani in ay ku shaqeeyaan qorshaha guud ee qaranka.

## Golaha Guurtida

Xisbiga UCID waxa uu aaminsanyahay in golaha guurtidu saldhig u ahaayeen isla markaana ay qayb weyn ka qaateen dawladnimadii Somaliland ee goonni isutaaggeeda iyo dib u dhiskeedii. Waxa sidoo kale uu Xisbiga UCID aamminsanyahay in waayo-aragnimada laga dhaxlay 26ka sanno ee guurtidu jirtay oo laga barto casharro kuwaas oo u baahan dib u eegis. Waxa aannu ballanqaadeynaa in shirweyne qaran oo dib u eegis lagu sameeyo aannu qaban doono si loo caddeeyo, yaa guurti noqon kara? ma dhaxaltooyo ayey noqonaysaa guurtidu? Sidee loo soo buuxinayaa guurtida haddii geeriyi ku timaad? Awoodda guurtada? Tirada Guurtidu miyaa la koobayaa mise intan bay ahaan doonaa iyo waydiimo kale oo u baahan in talo qaran oo loo dhanyahay laga yeesho.

**Hay’adaha kale ee Xukuumadda UCID dib u habayn iyo dib dhis ku samayn doono**

1. Bangiga dhexe
2. Xafiiska Hantidhawrka iyo xisaabiyaha guud
3. Guddida caddaaladda qaranka
4. Xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka.
5. Hay’adda waddooyinka JSL.
6. Xafiiyada badhsaabbada gobollada.
7. Hayadda shqaalaha.
8. Hayadada CID oo lagu beddeli doono Somaliland Investigation Agency.

## CUTTUBKA LABAAD: SUGIDDA CADDAALADDA DALKA

Waxa aan la isla diidayn in maanta caddaaladda Somaliland, ee ay gacmaha ku hayaan maxkamaduhu, dhutinayso oo ay leedahay gol-daloolooyin badan oo shacbigu ay ku dhibban yihiin.

Xisbiga UCID waxa uu ku samayn doonaa maxkamadaha iyo hay'adaha kale ee caddaaladda isbeddel dul iyo hoos ah.

Xisbiga UCID waxa uu ballannqaadayaa in uu dib-u-habayn, kaabis iyo wax-ka-beddel ku samayn doono qaanuunka caddaaladeed ee dalka, si meesha looga saaro sharciyada gaboobay ee aan wakhtigan shaqayn karayn, lagana dhaxlay nidaamkii dulmiga ku dhisnaa ee Siyaad Barre, sida Xeerka Ciqaabka (Penal Code) Xeerka Ciqaabta Guud iyo Habkiisa, Xeerka Madaniga iyo Habkiisa, Xeerka Qareennada, Xeerka Nootaayooyinka iyo Xeerka Anshax-marinta Garsoorka loona soo saaro sharciyo la jaanqaadaya isbeddelka dalka, Shareecada Islaamka iyo horumarka la hiigsanayo. Waxa kale oo uu xisbigu ka hawlgelin doonaa dejinta iyo samaynta siyaasadaha hannaanka caddaaladda muhiimka u ah sida; Siyaasadda Caddaaladda Guud, Siyaasadda Caddaaladda Dambiilaha, Siyaasadda Caddaaladda Carruurta.

Xisbiga UCID waxa uu gebi ahaanba meesha ka saarayaa Wasaaradda Caddaaladda ee haatan iskeed u taagan, taas oo uu ka dhigi doono waax (Department of Justice) hoos timaadda Wasaaradda Diinta. Sidaas daraaddeed, waxa aannu abuuraynaa wasaarad la yidhaahdo Wasaaradda Diinta, Awqaafta iyo Caddaaladda.

Xisbiga UCID waxaa sida oo kale ka go'an, oo uu ku dhaqaaqi doonaa, sidii loo kala saari lahaa Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuuriga ah (Separation of Supreme and Constitutional Courtes). Si taasi u suurtagashana, waxaa si daastuurka qaranka waafaqsan loo samayn doonaa Guddi 7 xubnood ka kooban, oo Maxkamadda Dastuuriga ah maamula; iyo Guddi kale oo 7 xubnood ka kooban oo Maxkamadda Sare maamula; iyada oo guddi kastaa yeelan doonto qaab-dhismeedkeeda, hawlaheedana si weyn loo qeexi doono. Labada guddiba waxa guddoomin doona Guddoomiyaha Waaxda Garsoorka Somaliland (guddoomiyaha maxkamadaha sare iyo ta distooriga ah, oo ah hal qof, ayaa ah guddoomiyaha waaxda garsoorka). Waxaa kale oo la curin

doonaa xeerkii fasiraadda dastuurka, si looga fursado muranno dastuuri ah oo soo noqnoqda, ku tumasho sharci oo timaadda iyo isfahandarro siyasadeed oo timaadda.

**Maxkamado Caddaalad ku Dhisan**

Sida magaciisa ka muuqata, Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa in uu waddanka ka hirgeliyo caddaalad loo siman yahay, oo ku salaysan shareecada Islaamka, isla markaana waafaqsan dastuurka dalka.

Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa in uu waddanka ka hirgeliyo caddaalad loo siman yahay, sida magaciisa ka muuqata, lana hirgeliyo qodobbada caddaaladda ee dastuurka iyo xeerarka waddanka ku cad.

Waxaannu dib u eegi doonnaa maamulka maxkamadaha dul ilaa hoos, si loo xaqiijiyo caddaalad taam ah oo muwaaddin kastaa u helo xuquuqdiisa.

Xisbiga UCID waxa ka go'an in uu maamulka maxkamadahu noqdo mid madaxbannaan, isla markaana si madaxbannaan loogu asteeyo nidaam miisaaniyadeed gaar ah Waaxda Garsoorka dalka (the judiciary organ of the state). Dhinaca kale, waxa aannu ka shaqaynaynaa sidii hoggaanka garsoorka dalku u gudan lahaa waajibaadkiisa, kormeer iyo qiimayn buuxdana ugu samayn lahaa hawl-wadeennada caddaaladda dalka, si loo helo dallacsiintii, erigii iyo hoos-u-dhigistii hawl-wadeennada garsoorka (appraisal, discharge, and demotion), taas oo dhiirrigelinaysa shaqa-wanaagga iyo tayada adeegga waaxda garsoorka.

Waxa aannu dib u eegaynaa qaabdhismeedka Guddida Caddaaladda, iyada oo meesha laga saari doono wax saamayn ah oo ay fulintu ku yeelato guddidaas. Tusaale ahaan, waxaa la baabbi'in doonaa xubinnimadaha Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha iyo madaxda Wasaaradda Caddaaladda ee guddidaas; iyada oo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Diinta, Awqaafta iyo Caddaaladda oo keliya uu xubin ka noqon doono guddidaa, isla markaana aanu ka qaban karayn xil xubinnimo dhaafsiisan.

Xukuumadda UCID waxa ay samayn doontaa Guddida dabagalka caddaaladda oo ka madaxbannaan maxkamadaha, fulinta iyo bahda garsoorka. Ku waas oo dabagal iyo qiimeyn ku samayn doona xukunnada iyo looyarrada dhacay.

Waxa aannu kor u qaadi doonnaa tayada garsoorayaasha iyo looyarrada maxkamadaha, iyada oo waajib laga dhigi doono in garsoore kastaa noqdo mid aqoon sare u leh shareecada Islaamka, qaanuunka iyo dhaqanka dadka JSL, isla markaana yahay qof si dhammaystiran uga soo baxay jaamacad. Waxaannu sida oo kale si weyn oo degdeg ah u tababbari doonnaa shaqaalaha haatan ka hawgala Waaxda Caddaaladda, ee aan aqoonta lahayn, balse ka nadiif ka ah eex iyo wax-isdabamarin. sida oo kale, waxa aannu waajib ka dhigaynaa in dhamaan kalkaaliyayaasha maxkamadahu yeeshaan aqoon diineed iyo mid qaanuun oo u suurtagelisa in ay ku sifoobaan adeegayaal iimaan leh, isla markaana tayo waxqabad iyo caddaalad leh. Tallaabadaas kor ku xusani waxa ay meesha ka saari doontaa aqoon la'aanta haatan ka jirta maxkamadaha dalka..

Xisbiga UCID waxa uu soo saari doonaa Garsoorayaal aqoon u leh dacwadaha carruurta, waxaana la aasaasi doonaa maxkamado u gaar ah dacwadaha carrurta. Sida Xeerka Caddaaladda Carruurtu (JJL) uu dhigayo waxa Maxkamadahan yeelan doonaan Garsoorayaal khibrad u leh dacwadaha carruurta, Xeer-ilaalin, Qareenno iyo boolis u tababaran in ay qayb ka ahaadaan kiisaska carruurta.Waxa aannu dib-u-eegis iyo deraasayn ballaadhan ku samayn doonnaa tayada iyo tirada maxkamadaha dalka; iyada oo la samayn doono maxkamad u gaar ah dacwadaha madaniga ah (civil) iyo maxkamad u gaar ah dacwadaha denbiyada (criminal), si loo sugo xaqa muwaaddinka iyo ciqaabta  sharci ama xadgudubka ku wajahan labadaba. Sida oo kale, waxa aannu samayn doonnaa maxkamad maaraysa dacwadaha ku saabsan arrimaha maamulka (administrative court) ee ay dawladdu qaybta ka tahay.

Si loo sugo wacyiga dadweynaha ee ku wajahan xuquuqda ay leeyihiin iyo waajibaadka qaran ee saaran, isla markaana loogu fududeeyo helidda adeegyada caddaaladeed ee ay u baahan yihiin, waxa la aasaasi doonaa xarun shaqadeedu tahay wacyigelinta sharcia, iyo xidhiidhinta dadweynaha iyo hay'adaha caddaaladda. Xaruntani waxay gudan doontaa mas'uuliyado ay ka mid yihiin:

- Wacyigelinta iyo shuruuc-faafinta.
- Xallinta dhibaatooyinka maamul (idaariga ah) ee dadku tirsanayaan.
- Talabixinta sharciyada u baahan wax-ka-beddelka.

Waxa aannu xaruntan ka shaqaalaysiin doonnaa dad aqoon sare iyo hawlkarnimo leh. Xaruntani waxay ka shaqayn doontaa, sidoo kale, dib-u-habaynta xeerarka dalka, taas oo uu rabo Xisbiga

UCID in lagu suurtageliyo qawaaniin waafaqsan dastuurka, la jaanqaadaya horumarka dalku hiigsanayo, isla markaana iswaafaqsan oo aan iska hor imanayn.

### Tayaynta Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud

Waxa aannu tayayn xoog leh ku samayn doonnaa xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee qarankam iyada oo aannu curin doonno siyaasad iyo hannaan (policy and procedures) cad, oo xeer-ilaalintu ay kula shaqayso waaxada dawladda ee caddaaladda iyo fulinta (Judiciary and Executive organs); iyo sidoo kale doorka iyo wadashaqaynta uu xafiiskani la leeyahay waaxaha nabadgelyada (Police and Investigation Departments). Si taasi u suurtagasho, waxa aannu curinaynaa siyaasad qaran oo baadhitaan (National Investigation Policy), taas oo lagu aasaasi doono hay'ad baadhitaan oo la yidhaahdo "Hay'adda Baadhitaanka Qaranka (National Investigation Agency)" oo si toos ah u hoos iman doonta Xeer-ilaaliyaha Guud ee qaranka. Hay'addani waxay noqon doontaa mid beddesha hay'adda CID-da la yidhaahdo ee haatan hawlgasha, waxaanay noqonaysaa hay'adda ugu sarraysa ee baadhista denbiyada dalka gudihiisa ka dhaca, iyada oo si madaxbannaan hawlaheeda u gudan doonta, oo aanay cidina awoodi doonin in ay joojiso baadhitaan ay bilawday.

Si nabadgelyada gudaha loo xoojiyo, loogana hortago falal kasta oo dhibaataynaya nabadgelyada nafaha iyo hantida muwaaddiniinta, loona qabto oo sida ugu dhakhsaha badan caddaaladda loo horkeeno denbiilayaasha, waxaa kormeer iyo qiimayn joogto ah lagu samayn doonaa adeegga, tayada, iyo caddaaladda qaybaha denbibaadhista iyo ilaalinta nabadgelyada.

### Sugidda Xuquuqda Dadka (*Xuquuqul Insaanka*)

Xisbiga UCID waxa ka go'an, oo uu ballanqaadayaa, ilaalinta xuquuqda iyo xorriyadda muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Somaliland, iyada oo uu si dhab ah u hirgelin doono dhammaan qodobbada dastuuriga ah ee dammaanad-qaadaya xuquuqda iyo xorriyadda (Human Rights and Freedoms).

Waxa aannu ka dhaqaaqaynaa dhismaha qaab-maamul iyo hoggaan qaran oo u taagan difaaca, ilaalinta iyo ixtiraamka xuquuqda iyo xorriyadda ay dammaanad-qaadeen diinteenna Islaamka iyo dastuurkeennu. Arrintaa waxaannu ku suurtagelinaynaa iyada oo qiimayn joogto ah lagu sameeyo hay'adaha dawladda iyo xarumaha xabsiyada, iyada oo sidoo kale aannu wadashaqayn dhaw la yeelan doonno dhammaan hay'adaha madaxa bannaan ee ku hawlan xuquuqda insaanka.

Xisbiga UCID waxa uu dib u eegayaa Komishanka Xuquuqul Insaanka hadda jira iyo xeerkii lagu aasaasayba.

## CUTTUBKA SADDEXAAD: CIIDAMADA DALKA[1] IYO KOBCINTA AMMAANKA

Xisbiga UCID waxa uu u taagan yahay dhisidda ciidamo cuddoon oo leh waxyaabihii looga baahnaa. Sidaa darteed, waxaannu ciidamada dalka ku xoojin doonnaa aqoon ay u yeeshaan diinta Islaamka, waddaniyadda, asluubta xilgudasho iyo xirfado kala duwan oo ay kaga qaybqaataan horumarinta qaranka JSL. Waxa aannu ku dhaqaaqi doonnaa sidii ay ciidamadu u wada yeelan lahaayeen astaamo aqooneed, asluubeed, waddaniyadeediyo hawlkarnimo. Taas oo keeni doonta in ciidamada dalku noqdaan qaar u taagan adkaynta midnimada dalka iyo dadka, difaaca diinta iyo ilaalinta karaamada muwaaddiniinta, xorriyatul qawlka iyo ka fogaanshaha wixii karaamada dalka hoos u dhigaya.

### Ciidanka Qaranka

Waxa aannu mudnaanta siinaynaa sidii dalku uu u yeelan lahaa Ciidan Qaran oo tayo leh casrina ah (modernized National Force), oo qaba tababbarkii loo baahnaa, kuna qalabaysan hubka casriga ah iyo aqoon milateri, isla markaana gudan kara waajibaadkiisa difaac. Waxa uu Xisbiga UCID ballanqaadayaa in uu dhammaystiro samaynta qaybaha ciidan ee qaran yeelan karo, sida ciidanka difaaca cirka, ciidanka difaaca dhulka, ciidanka badda, ciidanka difaaca xeebaha iyo qaybaha kale ee ciidan yeelan karo.

Ciidanka qaranka ee Xisbiga UCID dhismihiisa samaynayo waxa saldhig u ahaanaya tababbarro dhammaystiran, qalabayn casri ah iyo tayo uu ku gudan karo waajibaadka uu u xilsaaran yahay.

Waxa aannu dib u eegi doonnaa nidaamkii qaybinta derejooyinka ee la hirgeliyey, waxa aannu si gaar ah u eegi doonnaa cabashooyinkii iyo tabashooyinkii ka soo baxay. Waxaannu sidoo kale ballanqaadaynaa in aannu kordhinno mushaharka kafaynaya baahiyahooda iyo kuwa qoysaskooda iyo in ay helaan daryeelkii ciidan u baahnaa. Waxa xukuumadda UCID bilaabaysaa in guryaha iyo shaqaalaha dawladda loo sameeyo guryo ku habboon oo ay degaan.

[1] Waxa xusid mudan in Xisbiga UCID siyaasad dhammaystiran oo faahfaahsan uu u dejiyay tayaynta ciidamada dalka. Balse waxaa dhukumentigan lagu qoray in kooban oo siyaasaddaas ka mid ah, sababo la xidhiidha ilaalinta sirta qaran ee dalka Somaliland, maaddaama arrimaha ciidamadu xasaasi yihiin.

Xisbiga UCID waxa uu tayaynayaa dugsiyada tababbarka ee hadda jira, isaga oo abuuraya kulliyado ciidan oo hor leh, isla markaana u diri doona tababbar dibadeed saraakiisha, layli saraakiisha iyo saraakiil-xigeennada.

**Ciidanka Booliska**

Si loo sugo nabadgelyada dadka reer Somaliland, oo qof kastaba naftiisa iyo maalkiisu u nabadgalo, waxa Xisbigu tayayn doonaa hawlaha ciidanka booliska, iyada oo tababbar sare iyo aqoon la siinayo. Xisbiga UCID waxa uu ku qalabayn doonaa ciidanka booliska isgaadhsiin iyo qalab casri ah oo u fududeeya hawlihiisa.

Waxa la casriyayn doonaa dugsiyada tababbarka booliska ee hadda jira, waxaana la dhisi doonaa dugsiyo sare iyo kulliyado u gaar ah hawlaha booliska.

Waxa uu Xisbiga UCID dhammaystiri doonaa dhismaha qaybaha ka dhiman ciidanka booliska, taas oo wax weyn ka geysan karta sugidda amniga dadweynaha iyo nabadgelyada maritaanka waddooyinka. Sidoo kale in dhismayaasha saldhigyada lagu sameeyo dib u habayn dhisme iyo qalabayn casri ah oo la jaanqaadi karta dunida.

Xisbiga UCID waxa uu abuuri donaa adeegyo lagu daryeelo ciidanka booliska, sida daryeel caafimaad. Sidoo kale waxa uu  xukuumadda xisbiga UCID kordhin doontaa mushaharooyinka ciidanka booliska mushahar ku filan oo kafayn kara iyaga iyo qoyskooda.

Xisbiga UCID waxa uu doonayaa in booliska waddanku noqdo mid saaxiib la ah dadweynaha.

Xisbiga UCID waxa uu tayaynayaa dugsiyada tabbabarka booliska ee hadda jira, isaga oo abuuraya kulliyado boolis, isla markaana u diri doona tababbar dibadeed saraakiisha, layli saraakiisha iyo saraakiil-xigeennada.

**Ciidanka Asluubta**

Ciidanka asluubtu isaga oo kala mid ah ciidamada kale dhinacyada dhismaha, tayaynta iyo kor-u-qaadista daryeelkoodaba, Xisbiga UCID waxa uu qaddarinayaa hawlaha u gaarka ah ciidanka abluubta, sida in ciidanka asluubtu noqdo mid aqoon u leh xuquuqda aasaasiga ah ee maxaabiista, siiyana ixtiraamka iyo daryeelka ay mudan yihiin. Sidaas daraaddeed, Xisbiga UCID wuxuu dejin doona nidaam maxaabiista tababar iyo dhaqancelin buuxda lagu sinayo, si ay bulshada iyaga oo akhlaaq iyo dhaqan-wanaag leh dib ula jaanqaadaan.

Xisbiga UCID waxa uu tayaynayaa dugsiyada tababbarka ciidamada asluubta ee hadda jira, isla markaana u diri doonaa tababbar dibadeed saraakiisha, layli saraakiisha iyo saraakiil-xigeennada.

### Ciidanka Sirdoonka iyo Socdaalka

Dhinaca kale, Xisbigu waxa uu tababbar iyo tayayn ku kabi doonaa laanta socdaalka iyo ciidamada sirdoornka, si ay u gutaan waajibaadkooda qaran, oo aanay ku sifoobin ciidan lagu cabbudhinayo xorriyadaha aasaasiga ah ee shacabka, isla markaana ku qalabaysnaan doonaan agab casri ah oo ay ku dammaanad-qaadi karaan amniga dalka iyo ka hortagga dhibaatooyinka cadawga gudaha iyo dibadda Jamhuuriyadda Somaliland.

### Adkaynta nabadda iyo amniga

Xisbiga UCID waxa uu aaminsan yahay in nabadda iyo amnigu yihiin saldhigga horumarka, jiritaanka qarannimada Jamhuuriyadda Somaliland iyo nolosha muwaaddiniinta dalka. Sidaa darteed, Xisbiga UCID waxa ka go'an, oo uu ballanqaadayaa, adkaynta nabadgelyada iyo amniga, si loo midha-dhaliyo yoolka qaran ee aynu hiigsanayno, isla markaana ay Somaliland u noqoto dal lagu mejeerto xasiloonnida, dawladnimada iyo horusocodka.

Xisbiga UCID waxa uu barnaamijkiisa nabadgelyada iyo amniga ku xaqiijin doonaa tallaabooyinkan:

- Sugidda amniga iyo nabadda gudaha, iyo difaaca iyo sugidda xuduudaha (sida dhulka, badda iyo hawada).
- Ka hortegidda wixii khilaafaad iyo qulqulatooyin keeni kara.
- Xakamaynta hubka fudud iyo diiwaangelintooda.
- Tayaynta iyo kor-u-qaadista aqoonta, qalabka iyo wacyiga hay'adaha amniga ku shaqada leh.

Sida oo kale, waxa aannu u aragnaa micnaha nabadda mid ka baxsan xaalad dagaal, dirir la'aanta; balse ka dhumuc weyn intaa. Sidaa daraaddeed, Xisbiga UCID waxa uu ka shaqayn doonaa sidii uu u adkayn lahaa kaabayaasha nabadgelyada iyo amniga saldhigga u ah, ee ay ka mid yihiin: sugidda caddaaladda; kobcinta dhaqaalaha qaranka iyo dakhliga dadweynaha; ladagaalanka saboolnimada, musuqmaasuqa iyo wax-isdabamarinta maamul, eexda/qaraaba-kiilka; iyo koruqaadista aqoonta iyo wacyiga dadweynaha. Waxa kale oo aannu samaynaynaa barnaamij qeexan oo ku wajahan ilaalinta nabadgelyada qaranka iyo amniga muwaaddiniinta, iyada oo laga hortegi doono wax kasta oo dhibaato ku ah nolosha, xorriyadda iyo xuquuqda muwaaddiniinta.

## CUTTUBKA AFRAAD: DHAQAALAHA

Dhaqaaluhu wuxuu lafdhabar u yahay nololosha iyo jiritaanka ummad kasta. Dhaqaaluhu waa qaddiyad hor leh oo ka mid ah waajibaadyada maamulada xilkaska ahi kobcintiisa iyo ilaalintiisaba iska xilsaaraan.

Xisbiga UCID waxa uu rumaysan yahay in aanay jirin hirgelin lagu sameeyay qorshaha iyo siyaasadda dhaqaale ee dalka. Waxaa kale oo xaqiiq ah in dakhliga dawladda iyo hantida ummaddu guud ahaan ay inta badan faro dhexdood ka baxaan; isla markaana ay saameeyeen musuqmaasuq iyo lunsi badheedh ahi.

Sida Dastuurka Qaranka **qodobkiisa 11aad** dhigayo, Xisbiga UCID waxa uu hirgelin doonaa dhaqaale ku salaysan suuqa xorta ah, isaga oo isla markaasna aan u oggolaanayn in dhaqaalaha dalku noqdo hannaanka fara-ka-qaadka ah ama mid xakamaysan (monopoly). Sidaa daraadded, waxa aannu ku dedaalaynaa in dhaqaalaha dalku noqdo mid isku dhafan.

Xisbiga UCID waxa uu si cilmiyaysan u maaraynayaa dhaqaalaha waddanka, isaga oo kaashanaya cilmibaadhisyo ku qotoma xaqiiqooyinka jira. Xisbiga UCID waxaa uu sidoo kale dhisayaa kaabayaasha dhaqaalaha saldhigga u ah (Infrastructure Economy), sida waddooyinka, dekedaha madaarrada, biriijyada iyo isgaadhsiinta casriga ah ee fududaynaysa dhaqdhaqaaqa dhaqaale.

UCID waxa ka go’an in tayayn ballaadhan lagu sameeyo xarumaha dhaqaalaha dalka ee hadda jira, laguna kaabo kuwo cusub oo hor leh (Governmental financial institutions).

Tallaabooyinka kale ee Xisbiga UCID ka qaadi doono arrimaha dhaqaalaha waxa ka mid ah:

- Dejinta siyaasad dhammaystiran iyo qorshe sax ah oo dhaqaale; qorshaha dhaqaale ee qaran (national economic planning and policy) ee Xisbiga UCID uu JSL u hayaa waa mid higsiigiisa iyo ujeeddooyinkiisu yihiin:
    - Iyada oo laga faa’idaysanayo bogcadda Ilaahay ku abuuray dalka Somaliland, ayaa Xisbiga UCID hiigsanayaa sidii Somaliland u noqon lahayd iskuxidhka qaaradaha Eeshiya, Afrika, Yurub, iyo Waqooyiga Ameerika; iyo in Somaliland xaqiijiso in ay noqoto quwadda dhaqaalaha Bariga Afrika (Economic power house of East Africa).

- In la kordhiyo dakhliga dadweynaha (per capita income).
- In ilaa iyo xad lala dagaalamo, oo la yareeyo, heerka shaqo la'aanta iyo ka faa'idaysi la'aanta awoodda ummadda (unemployement and idleness).
- In la xasiliyo qiimaha nolosha (price level stabilization).
- In ilaa iyo xad lala dagaalamo, lana yareeyo, fakhriga iyo sinnaan la'aanta dakhli (reduction of poverty and income inequality); iyo in la hiigsado in ugu yaraan muwaaddiniinta laga daboolo saddexda baahiyadood ee aasaasiga ah: Hoyga, Hunguriga iyo Hu'ga.
- In la helo dhaqaale aan lug keliya ku taagnayn ee isku filan, tiirar xooggan oo kala geddisanna ku taagan (diversify and self-reliancy based economy).
- Si fursado loogu abuuro ganacsatada dhexe iyo kuwa yaryar ee reer Somaliland, dhaqaaluhuna u noqdo mid baaha, xukuumadda UCID waxa ka go'an in siyaasadda kala xadeynta ganacsiga la hirgeliyo.

Ujeeddooyinkaa waxa muhiimadda loo kala siin doonaa sida ay u kala lamahuraansan yihiin.

Xisbiga UCID waxa uu ku dhaqaaqi doonaa nidaaminta ganacsiga dalka, iyada oo loo mari doono dejinta iyo dhaqangelinta qawaaniin saamaxaya ganacsi xor ah oo nidaamsan, isla markaana badhi-taageeraya qorshaha dhaqaale ee dalka. Taas oo keenaysa ilaalinta danaha ganacsatada iyo bulshada (merchants and consumers).

**Kor-u-qaadista wax sosaarka aasaasiga ah (Primary Produce Production)**

Xisbiga UCID waxa uu si weyn u ballanqaadayaa in uu dejin doono qorshe kor loogu qaadayo wax soosaarka aasaasiga ah ee dalka, sida kalluunka, milixda, macdanaha iyo khayraadka dhulku ku duugan, beeraha iyo xoolaha; iyada oo suurtagelinta arrintaasna loo marayo raadinta maalgashi gudeed (local investment) iyo maalgashi dibadeed (foreign investment), iyo raadinta suuqyo hor leh oo si joogto ah loogu iibgeeyo waxsoosaarkaas.

Xisbiga UCID waxa uu ganacsatada dalka si xooggan ugu dhiirrigelin doonaa in ay u midoobaan maalgashiga dhabta ah ee dalkooda iyo in ay ku foognaadaan wax-dhoofinta, halkii ay waxsoodejinta ku foognaan lahaayeen; si bulshadani u noqoto bulsho inta badan wax dhoofisa, waxsoosaarkeedana iibgeysa (export-oriented society) isla markaana loo yareeyo lacagta adag ee dalka dibadda uga baxaysa. .

### Kalluunka, Khayraadka Badda iyo Barriga

Waxa aannu dib-u-dhis ku samaynaynaa dekedaha dalka, isla markaana horumarin ku samaynaynaa xeebaha, si loo helo waxsoosaar kalluun oo hor leh, iyo waxdhoofin ballaadhan. Xukuumadda Xisbiga UCID waxa ay abuuri doontaa Hay'adda Horumarinta Dekedaha Qaranka (National Port Development Agency), taas oo ku foogganaan doonta horumarinta, kobcinta iyo tayeynta dekedaha dalka.

Dekedahana aannu wax ka qaban doono waxa ka mid ah: Lawyacaddo, Saylac, Lughaya, Xarshaw, Waqadariya, Laasqoray iyo Ceelaayo. Xisbigu waxa uu dhiirrigelinayaa maal-geshiga dekedaha dalka. iyada oo dekedda Berbera laga dhigi doono mid ay ka faa'idaystaan waddamada Bariga Afrika ee aan badda lahayn; iyada oo la abuurayo kaabayaasha isgaadhsiineed sida Berbera Coridor, iyo in suuqyo cusub loo raadiyo isticmaalka dekedda.

Waxa la casriyayn doonaa magaalooyinka xeebaha , iyada oo la samayn doono waddooyin wanaagsan iyo isgaadhsiin casri ah. Sidoo kalana loo samayn doono koronto ku filan. Waxa cashuurta laga dhaafi doonaa qaboojiyayaasha lagu isticmaalo magaalooyinka xeebta iyo talaajadaha. Waxa kale oo la khafiifin doonaa cashuurta shaqaalaha iyo dukaannada ka furan magaalooyinka xeebta ah.

Xukuumadda xisbiga UCID waxa uu hirgelin doonaa suuqa ugu weyn kalluumaysiga ee Geeska Afrika.

Waxa aannu samayn doonnaa kulliyado aan ku koobnayn hal gobol ee gobollada xeebaha ku yaalla. Waxa la dhiirrigelinayaa barashada dhaqniinka iyo dakhtarrada Kalluunka.

Waxa aannu tayayn ku samayn doonnaa ciidamada ilaalada xeebaha, iyada oo lala kaashan doono bulshada caalamka, si loo ilaaliyo khayraadka badda, iyada oo deraasad lagu samayn doono khyaraadka badda Somaliland. Waxa la dhiirrigelin doonaa dhoofinta dhammaan khayraadka aan laga faa'idaysan ee dalkani leeyahay, taas oo lagu xaqiijinayo in isha ugu muhiimsan ee dhaqaalaha dalku noqoto waxsoosaarka xeebaha iyo khayraadka badda.

Xisbiga UCID waxa uu ku dedaali doonaa sidii loola soo bixi lahaa, ama looga faa'idaysan lahaa, isla markaana loo dheefsan lahaa, khayraadka barriga, sida beenyada, falleenka,

shiidaalka, iwm. Si loo helo dad xirfad u leh kalluumaysiga, Xukuumadda UCID waxa uu ku tababari doonaan dadka ku nool deegaannada xeebaha habka kalluumaysiga ee casriga ah.

Waxa la dhiirrigelin doonaa dhoofinta dhammaan khayraadka aan laga faa'idaysan ee dalkani leeyahay.

**Biyaha iyo Macdanaha Dalka**

Xibiga UCID waxa ka go'an sidii magaalooyinka waaweyn iyo kuwa yaryarba loo gaadhsiin lahaa biyo nadiif ah, si loo yareeyo cudurrada shubanka yo dhimashada carruurta reer Somaliland.

Xisbiga UCID waxa uu aaminsan yahay in biyaha dalalka Geeska Afrika sannaddadii u danbeeyay ay hoos u dhacayeen, isla markaana ay lamahuraan tahay in dalka Somaliland yeesho qorshe jaango'an oo biyaha dhulka ku jira lagula soo baxayo, kuwa roobka ku yimaaddana loo kaydin lahaa si looga badbaado abaaro iyo in nolosha muwaaddiniintu khatar gasho (eeg siyaasadda biyaha ee Xisbiga UCID).

Dhinaca kale, Xisbiga UCID waxa uu ku dhaqaaqi doonaa sidii waddankani maalgelin ugu raadin lahaa, isla markaana loo soo saari lahaa, macdanaha kala geddisan ee dhulka ku jira. Waxa aannu deraasad ku samayn doonnaa macdanaha kala duwan ee dhulkeenna ku jira. Sidoo kalana waxa aannu raadin doonnaa suuqyo loo iibgeeyo oo hor leh, iyo maalgashi lagula soo baxo khauraadkaas. UCID waxa ka go'an in khayraadka dalku guud ahaan iyo gaar ahaan macnahu maamulkoodu noqdo mid caddaalad ku dhisan, isla markaana dadka iyo dalkaba wax loogi qabto, laguna horumariyo noloshooda iy dhismaha dalka.

**Xoolaha iyo Beeraha**

Maaddaama uu dhaqaaluhu ku fadhiyay muddo badan xoolaha nool, dadkeennuna u badan yahay reer guuraa, waxa aannu si weyn ugu hawlgeli doonnaa kobcinta daryeelka iyo dhaqaalaynta xoolaha iyo reer guuraaga, si looga hortago in dadka xooladhaqatada iyo kalluumaysatada ahi ku soo qulqulaan magaalooyinka waaweyn.

Xisbiga UCID waxa uu qaadanayaa siyaasad wax-ku-ool ah oo lagu raadinayo suuqyo hor leh, oo loo diro xoolaheenna, isla markaana lagu xoojinayo suuqyadii Carabta ee hore u jiray. Sidoo kale waxa uu ku dedaalayaa sidii loo casriyayn lahaa hababkii hore ee xoolaha loo dhaqan jiray,

loo raaci jiray, loona dhoofin jiray. Waxa si tartiib ah loo yarayn doonaa xoolihii noolaa ee la dhoofin jiray, iyada oo lagu beddelayo dhoofinta hilibka, hargaha, saamaha, lafaha iyo caanaha xoolaheenna. Waxa la sugi doonaa adeeg hufan oo lagu qaabbilo xooladhaqatada iyo beeraleyda. Dhinaca kalana waxa kor loo qaadayaa nadaafadda iyo caafimaadka goobaha xoolaha lagu dhaqo iyo kuwa kalluunka lagu kaydiyo.

Waxa aannu samayn doonnaa kulliyado aan ku koobnayn hal gobol ee gobollada xooluhu ku badan yihiin ku yaalla. Waxa la dhiirrigelinayaa barashada dhaqniinka iyo dakhtarrada xoolaha.

Xisbiga UCID waxa uu samaynayaa meel lagu baadho geela iyo sidii loo horumarin lahaa cunitaanka iyo hilibka geela ee dadka adduunka; waxa aannu qaadi doonnaa olole xoog leh oo lagu suuqgeynayo hilibka geela iyada oo bulshada caalamka laga raaridayo manfaca iyo caafimaadka ku jira cunitaanka hilibka geela iyo cabbitaanka caanihiisa.

Xisbiga waxa ka go’an in uu dejiyo siyaasad lagu soo celinayo dhul-daaqsimeedkii xoolaheenna, isaga oo dib u beeri doona noocyadii daaqsinkii nafaqada lahaa ee haatan sii dabargo’aya, iyada oo isla markaana dib-u-qorshayn lagu samayn doono, dibna loo soo celin doono, seera-daaqsimeedyadii guud ee dadka ka dhexeeyay, lana baabbi’in doono seerayaasha dadku sida sharcidarrada ah u ooteen.

Xukuumadda xisbiga UCID waxa uu hiigsanayaa sidii dhaqashada xooluhu u noqon lahayd waxyaalaha ugu faa’idada iyo sharafta badan, isla markaana looga gudbi lahaa aragtida ah in badawnimada iyo dhaqashada xoolaha xidhiidh ka dhexeeyo.

Waxaannu abuuri doonnaa bangiga xooladhaqatada, beeraleyda iyo kalluumaysatada horumariya (development and microcredit bank), kaas oo amaahin doona lacag reer guuraaga xooladhaqada ah, kalluumaysatada iyo beeraleyda. Dayntu wax dulsaar ah ma yeelanayso, laakiin waxa lagu xidhi doonaa shuruudo gaar ah. Sidoo kale, bangigani waxa uu raadin doonaa suqyo dibadeed iyo maalgashi hor leh oo lagu sameeyo dhinacyada kor ku xusan, isaga oo la garab taagnaan doona taageero farsamo, maaliyadeed iyo dhiirrigelineed.

Xisbiga UCID waxa uu dejiyay qorshe ku aaddan waxsoosaarka beeraha, oo marka hore ku fadhida cilmibaadhis xaqiiqo ah iyo talooyinka khubarada culuumta beeraha oo la soo ururiyay. Sidaa daraaddeed, Xisbiga UCID waxa ka go’an in uu si weyn kor ugu qaado waxsoosaarka

beeraha isaga oo dhiirrigelinaya maalgashiga beeraha, isla markaana qaadi doona olole lagu dhiirrigelinayo muwaaddiniinta in ay dhulkooda wax kala soo baxaan. Hawlgalkaas waxa loo bixin doonaa Hawlgalka Cagaaran (Green Revolution).

Si kor loogu qaado waxsoosaarka beeraha, waxa uu Xisbiga UCID dib u soo noolaynayaa mashaariicdii ay ka midka ahaayeen Wajaale, Xaaxi, Beer iyo qaar kale oo cusub oo la abuuri doono.

Xisbiga UCID waxa uu samaynayaa kayd qaran oo lagu ururiyo midhaha ama siidhka dalagga beeraha, laguna daryeelayo caafimaadkooda (seeds bank), si loo celiyo dhammaan dalaggii asalka ahaa ee dalka ka bixi jiray, loona kobciyo waxsoosaarka manfaca leh ee dhinaca beeraha.

Xukuumadda UCID waxa uu abuurayaa qoondo miisaaniyadeed oo dhan (3%) oo loogu talo galay kobcinta iyo horumarinta beeraha iyo xoolahaHorumarinta Xeebaha

**Nidaaminta iyo Xoojinta Bangiga Dhexe**

Bangiga Dhexe waa laf-dhabarta dhaqaalaha dalka, waxaanu mas'uul ka yahay hagidda iyo habaynta shuruucda bangiyada. Waxa kale oo uu mas'uul ka yahay daabacaadda lacagta qaranka, kaydinta iyo maamulidda lacagaha adag. Waxa uu sidoo kale xakameeyaa sicirbararka iyo qiimadhaca lacagta waddanka. Sidoo kale waxa uu Bangiga Dhexe uu adeege iyo nidaamiye u yahay bangiyada horumarinta iyo kuwa ganacsiga ee gaarka loo leeyahay (development and commercial banks). Waxaana uu Bangiga Dhexe maareeyaa xidhiidhka bangiyada caalamiga ah lala leeyahay.

Haddaba, maaddaamada muhiimadda intaas le'eg iyo doorka weyn ee kor ku xusan uu leeyahay Bangiga Dhexe, kaas oo uu dastuurka Somaliland **qodobkiisa 13aad** xusay, waxa aannu dib u habaynaynaa, oo tayaynaynaa Bangiga Dhexe ee haatan jira, iyada oo shaqooyinkii iyo doorkii dhaqaale ee Bangi Dhexe oo qaran lahaa la siin doono. Sidoo kale waxa la dhiirrigelin doonaa sidii bangiyo ganacsi oo gaar loo leeyahay loo samayn lahaa, si Bangiga Dhexe u ciyaari karo

doorkiisa. Xisbiga UCID waxa uu samayn doonaa, sidoo kale, bangiyo horumarineed oo u idman xoojinta dhaqaalaha dalka.[2]

**Aasaaska Guddida Dhaqaalaha Qaranka**

Guddidani waa mid talo aqoomaysan iyo kormeer la garab joogi doonta dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha dalka, iyada oo deraasadayn doonta heerarka dhaqaale ee la filayo in la wajaho. Faahfaahinta Guddidan waxa lagu qeexay qodobka 1.3.4 ee qorshahan waxqabad.

**Shaqa-abuuris**

Waxa lagu qiyaasaa in shaqo la'aanta shacbiga haysataa gaadhayso 70% ama ka badanba. Taasina waxa ay saamayn weyn oo taban ku leedahay horumarka guud ee waddanka oo dhan.

Waxa aannu hiigsanaynaa, oo naga go'an, in aannu ugu yaraan 15% bulshada ku dhaqan gobollada shaqo gelinno (shaqo u abuurno). Sidoo kale, waxa aannu tababbar shaqo siinaynaa ugu yaraan 30% dadka shaqayn kara.

Waxa aannu la imanaynaa qorshihii ka dhabayn lahaa yoolkaas, annaga oo dhiirrigelin doona maalgashiga waxsoosaarka dabiiciga ah iyo wershadaha (eeg kor: waxsoosaarka). Waxa aannu sidoo kale ganacsatada ku dhiirrigelinaynaa sidii loo kicin lahaa wershadihii hore ee hore u jiray, sida Wershaddii Sibidhka, Wershaddii Kalluunka, Hargaha iyo Saamaha; iyo abuuritaanka kuwo cusub oo hor leh. Sidoo kale, waxa aannu samayn doonnaa goobo ganacsi oo xor ah (free trade zones), iyada oo cashuurtana si caqligal ah looga dhimi doono goobahaas. Si taasi u suurtagasho, waxa la tayaynayaa maamullada dekedaha iyo madaarrada. Dhinaca kale, mashaariicda dibudhiska iyo horumarinta ah ee xukuumaddu waddaa waxay shaqaalaysiin doonaan shaqaale tiro badan, iyada oo dhammaan hawlwadeennada mashaariicdaasi noqon doonaan muwaaddiniin, marka laga reebo shakhsiyaad kooban oo ajaanib ah oo laga yaabo in looga baahdo aqoon farsamo ama xirfadeed.

---

[2] Sida Bangiga Horumarinta Xooladhaqatada, Kaluumaysatada iyo Beeraleyda; kaas oo ku dhaqaaqi doona sidii bulshada ku hawlan saddexdaa waxsoosaar ee aasaasiga ahi u horumari lahayd aqoon ahaan, farsamo ahaan iyo maaliyad ahaanba, isla markaana u heli lahaayeen suuqyo ay waxsoosaarkooda u iibgeeyaan.

Xukuumadda Xisbiga UCID waxa ay samayn doontaa sharci u saamaxaya muwaadiniinta reer Somaliland shaqo ay qaban karaan in aan qof ajanabi ah loo qoran karin si loo yareeyo shaqo la'aanta.

**Kobcinta Sanduuqa Sakada** (Somaliland Zakat Fund)

Sida Diinta Islaamku ina farayso, isla markaana ay tijaabiyeen kuna guulaysteen dalal badan iyo dawlado soo maray taariikhda Islaamku, waxa sakadu ay wax weyn ka tari kartaa daryeelka dadka baahan iyo la dagaalanka faqriga. Aasaaska iyo habsami-u-maamulka sanduuq sako waxa lagu xaqiijin karaa kobcinta nolosha dadka baahan iyo yarayn xoog leh oo lagu sameeyo faqriga baahsan ee sida weyn bulshada Somaliland ugu habsaday.

Sidaa daraaddeed, waxa aannu xoojin doonnaa Sanduuq Sako oo madaxbannaan, isla markaana ay maamulaan guddi xul ah oo ka kooban culimada diinta Islaamka, aqoonyahaniin, tujaar iyo dhallinyaro, kuwaas oo dhammaan qaybaha bulshada metelaya. Xisbiga UCID waxa uu aaminsan yahay in haddii si waxtar leh loo abaabulo, loona maareeyo, sanduuqaas sako (oo keliya) uu faqrigu si weyn hoos ugu dhacayo muddo 10 sannadood gudaheeda ah. Isla markaana daryeelka bulshada dhaqaalahoodu liitaa uu kor u kici doono. Iyada oo laga faa'idaysanayo diinteenna xaqa ah ee waajibisay sakada iyo aqoonta culimadeenna diinta, ayaa Xisbigu ku dhaqaaqi doonaa sidii sanduuqaas sako u noqon lahaa mid taabbagal ah oo awood u leh in uu kaalin mug leh ka qaato yaraynta saboolnimada iyo horumarinta dhaqaale ee Somaliland.

**Tayaynta Hay'adda Shaqaalaha Qaranka**

Waxa aannu dibuhabayn iyo tayayn laxaad leh ku samayn doonnaa Hay'adda Shaqaalaha Qaranka, iyada oo la siin doono doorkeeda mugga leh ee dastuurka Somaliland xusay. Hay'addani waxay noqon doontaa mid ku fooggan tayaynta shaqaalaha dawladda; haddii ay tahay tababbarkooda, deraja-siintooda, daryeelkooda iyo dhiirrigelintooda.

Dhinaca kale waxa aannu dhiirrigelinaynaa in shaqaaluhu samaystaan urur ay ku midaysanyihiin shaqaalaha guud ee dalku(Public & Private sector). Si uu u noqdo urur madaxbannaan oo u doodda xuquuqda shaqaalaha. Ururkani waxa noqonayaa hay'ad guud oo ka shaqaysa danaha shaqaalaha, sida mushaharka, fasaxyada, dallacaadda, tababbarka, iyo hawlgabka shaqaalaha

dalka – guud ahaan fulinta xeerka shaqaalaha. Ururkan waaxa lagu magacaabi doonaa Ururka Shaqaalaha Dalka (Labour Union).

Waxa aannu, dhinaca kale, samaynaynaa kaydka xogaha xirfadaha shaqaalaha (skill bank). Halkaas oo lagu diiwaangelin doono maskaxda toolmoon iyo aqoonta dadweynaha, iyada oo taas oo lagaga maarmi doono in khibrad dibadeed la raadiyo iyada oo mid taas la mid ahi dalka ku sugan tahay, ama ay ku jirto muwaaddiniinta aqoonta leh ee reer Somaliland.

**La dagaalanka Musuqmaasuqa (Zero-Tolerance Corruption Policy)**

Musuqmaasuqu waa cadawga 1aad ee horumarinta dhaqaalaha bulshada iyo guud ahaan hor-u-socodka dalka. Sidaa daraaddeed, Xisbiga UCID waxa ka go'an hirgelinta siyaasad aan u dulqaadanayn musuqmaasuq heer kasta oo uu taagan yahay.

Waxa aannu xoojinaynaa Hay'adda La Dagaalanka Muqusmaasuqa. Si ay arrimahaas u fududaadaanna, waxa xoojin ballaadhan lagu samayn doonaa xisaabiyaha guud iyo hanti-dhawrka qaranka.

Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa in hay'adaha dawliga ahi noqdaan qaar ka nadiif ah musqmaasuq, wax isdaba-marin iyo xatooyo hanti qaran, si dawladda Somaliland u noqoto mid sumcad leh, oo xushmayn iyo qaddarin ku dhex leh bulshada caalamka, laguna dhiirrado in lala macaamilo, la taageero, isla markaana dalkeeda la maalgashado.

**Dib-u-habaynta Nidaamka Cashuuraha Dalka**

Xisbiga UCID waxa uu aaminsan yahay in hannaanka haatan cashuuraha dawladda loo qaadaa uu yahay mid aan caddaalad ku dhisnayn, kuna salaysnayn siyaasad isku xidhan oo cashuur bixiyaasha lagu wada gaadho; isla markaana qasnadda dawladda lagu soo wada gaadhsiiyo dhammaan lacagtii cashuuraha laga helay. Dhinaca kalana, sidii la rabayaanay ugu noqon muwaaddiniinta waxna loogu wada qaban, balse in badani ku lunto xatooyo iyo wax isdaba-marin laxaad leh oo dakhliga cashuuraha lagula kaco, laga soo bilaabo marka cashuur bixiyaha laga soo qaado, ilaa inta ay gaadhayso kaydka ugu danbeeya, iyada oo aan lahayn nidaam xisaabeed lagu kalsoonaan karo.

Sidaas daraddeed, waxa aannu samaynaynaa nidaam casri ah oo cashuuraha waddanka lagu maamulo, si dakhliga dalku u kobco, isla markaana aan loo lunsan; loona heli karo nidaam cusub oo cashuureed, kaas oo la jaanqaadi kara kobcinta dakhliga dawladda iyo horumarinta ganacsiga madaxa bannaan.

Waxa aannu soo celinaynaa kalsoonidii dadweynuhu ku qabay dawladda iyo adeegyada lagu maalgeliyo cashuurtooda. Sidoo kale waxa aannu curinaynaa barnaamijyo xoog leh dadweynaha lagu barayo waddaniyadda, waajibaadka saaran muwaaddiniinta iyo sida ay lamahuraanka u tahay in ay bixiyaan cashuurta, si qarankoodu u taabbagalo isuna bixiyo.

**Horumarinta Dalxiisa**

Dalxiisku iyo goobaha qadiimka ahi waxa ay qayb laxaad leh ka qaadan karaan koboca dhaqaalaha, xukuumadda Xisbiga UCID waxa ay xoojin doontaa ilaalinta iyo horumarinta goobaha dalxiiska ku habboon sida Sanaag, Awdal, Saaxil iyo goobaha kale ee qadiimiga ah.

## CUTTUBKA SHANAAD: CAAFIMAADKA

Xisbiga UCID waxa uu caafimaadka u arkaa baahiyaha madhaafaanka ah ee dawladdu u idman tahay. Xisbiga UCID waxa himiladiisu tahay in qof kasta oo reer Somaliland ahi helo adeeg caafimaad oo tayo leh, iyada oo yoolka Xisbigu yahay in la helo caafimaad qiimihuusu jaban yahay. Waxa aannu ku hamminaynaa in aannu daboolno baahiyaha caafimaad ee haatan jira. Xisbiga UCID waxa ka go’an sugidda iyo tayaynta adeegga caafimaad ee dalka. Iyada oo Xisbiga UCID uu isbeddel dul iyo hoos ah ku samayn doono caafimaadka Somaliland (Transforming Somaliland Health Policy). Si taa loo helana, waxa xukuumadda UCID 15% miisaaniyadda qaranka gelin doontaa caafimaadka dalka. Waxaanay hirgelin doontaa **qodobka 17aad** ee dastuurka qaranka oo waajibinaya ilaalinta iyo kobcinta caafimaadka qaranka.

Waxa aannu ku dhaqaaqi doonnaa in dib-u-eegis iyo kaabid lagu sameeyo xeerarka caafimaad ee waddanka ka jira, iyada oo kuwo cusubna la curin doono. Sidoo kalana, dib-u-qaabayn iyi tayayn xooggan ayaa lagu samayn doonaa Wasaaradda Caafimaadka, isla markaana dad aqoon sare iyo hawlkarnimo leh loo dhiibi doono hoggaainteeda. Si loo sugo caafimaadka guud ee muwaaddiniinta, waxa la raaci doonaa afar istaraatajiyadood oo qeexan, isla markaana isku xidhan, ayna lamahuraan tahay in la wada qaato sida hoos ku qoran:

1) Ka hortagga cudurrada keena dhimashada xad dhaafka ah, bukaanka iyo naafawga guud ahaan muwaaddiniinta, gaar ahaanna danyarta iyo inta aan adeegga caafimaad gaadhin (reduction of preventable diseases which cause excess in mortality, morbility and disability, particularly in poor, rural and marginalized towns).
2) Kor-u-qaadidda hab-nololeedka caafimaadku ku jiro, iyo hoos-u-dhigidda arrimaha khatargelin kara caafimaadka, kuwaas oo ka iman kara dhinaca deegaanka, dhaqaalaha iyo habdhaqanka bulsheed (promoting healthy lifestyles).
3) Samaynta hab caafimaad ku dhisan sinnaan, kana jawaaba baahida caafimaad ee ay dadweynuhu xaqa u leeyihiin in loo qabto, isla markaana la jaanqaadaya haynta bulshada oo ku salaysan qiima-lacageed suurtagal ah (developing health systems that equitably improve health outcomes, respond to people’s legitimate demands, and are financially fair).

4) Dejinta iyo hirgelinta siyaasad iyo jewi caafimaad oo la jaanqaadi kara nolosha dhaqan-dhaqaale iyo deegaan ee bulshada reer Somaliland (framing an enabling policy and creating an institutional environment for the health sector that affective compatible with the social, economic, environmental and development policies).

Haddaba, iyada oo laga duulayo istaraatajiyadaha kor ku xusan, ayaa Xisbiga UCID ku dhaqaaqi doonaa tallaabooyinkan soo socda:

- **Horumarinta iyo tayaynta hawlwadeennada caafimaadka**

  Xisbiga UCID waxa uu tayayn doonaa, isla markaana casriyayn doonaa xarumaha barashada caafimaadka ee haatan jira.

  - Waxa aannu maalgelinaynaa kulliyadaha caafimaadka ee jaamacadaha, iyada oo aannu ka dhigi doonno xarumo ardaydu u hoydaan (Boarding Medical Schools). Tallaabadan waxa aannu ku xaqiijin doonnaa soosaarista dhakhaatiir tiro ahaan iyo tayo ahaanba sarreeya, oo la jaanqaadi kara qorshaha caafimaad ee dalka.
  - Sidoo kale, waxa aannu tababbar iyo tayayn aqooneed ku samayn doonnaa hawlwadeennada caafimaad ee iminka ka hawlgala dalka, iyada oo aannu gobol kasta ka aasaasi doonno **dugsi** tababbara kalkaaliyayaasha caafimaadka iyo ummulisooyina (Nursing & Midwifery schools).
  - Waxa xukuumadda UCID ballanqaadaysaa in 5ta sanno ee hore ay tababari doonto 10,000 oo ummulisooyin ah dhammaan gobollada dalka si loo yareeyo ummul aroorka.
  - Waxa kale oo aannu gobol kasta ka dhisi doonnaa **guddi** caafimaad oo xul ah, kana kala socda bulshada qaybaheeda kala geddisan (regional health board). Guddiyadaas oo si toos u ah ula shaqayn doona Wasaaradda Caafimaadka.
  - Waxa aannu samayn doonnaa guddi dhakhaatiir iyo kalkaaliyayaal caafimaad isugu jira oo deemaada dalka oo dhan ku wareega (**mobile health units**), kuwaas oo isugu jira dhakhaatiir aqoon kala duwan leh, sida dhakhaatiirta dadka, xoolaha iyo deegaanka.
  - In xarumaha waxbarashada caafimaadka lagu soo kordhiyo takhasusyo ku lugleh soo saaridda dad aqoon u leh farsamaynta qalabka caafimaadka (Bio medic technicians).

- Xukuumadda UCID waxa ay aasaasaysaa barnaamijka shaqo qaran (National Public Service) oo u khaas ah mihnadlayaasha caafimaad ee ka qalinjebinaya xarumaha caafimaad. Arrintan oo looga gol leeyahay in la yareeyo baahiyaha caafimaad ee magaalooyinka iyo in la xoojiyo isdhexgalka bulshada.

- **Tayeynta Guddida Khubarada Caafimaadka (Health Professionals Association)**: Waxa aannu tayeynaynaa guddida heer qaran ah, oo xirfadlayaasha caafimaadka mideeya. Guddidani waxay ka shaqayn doontaa tayaynta caafimaadka dalka iyo ilaalinta waqabadka caafimaad ee dalka (health service). Shaqooyinka guddidan waxa ka mid noqon doona diiwaangelinta xirfadlayaasha caafimaad, kormeerka caafimaadka dalka, bixinta liisannada dakhaatiirta, kalkaaliyayaasha iyo xarumaha caafimaadka' iyo sidoo kale ilaalinta anshaxa caafimad ee loo baahan yahay.
- **Aasaaska Xarun Caafimaad oo gobol kasta laga hirgeliyo iyo tayaynta kuwii hore:** Waxa aannu gobol kasta ka aasaasaynaa xarun caafimaad oo casri ah, una yihiin agabkii, adeeggii iyo dawooyinkii dabooli lahaa baahida caafimaad gobolka kasta. Cisbitaal kasta oo haatan jirana waxa lagu samaynayaa tayayn xoog leh. Waxa aannu gobollada dalka ka dhisaynaa cusbitaallo guud, oo ay u dhan yihiin agabkii, dawadii, dhakhaatiirkii iyo nafadii loo baahnaa. Cisbitaalladani waxay yeelan doonaan qaybo lagu daryeelo dadka maskaxda wax ka qaba.

  Sidoo kale, waxa aannu tuulo kasta iyo degmo kasta ka aasaasaynaa xarun xanaano (MCH), iyada oo aannu kuwii hore u jirayna dibudhis, qalabayn iyo tayayn ku samayn doonno. Xarun kasta oo caafimaad waxa aannu u dhammaystiri doonnaa dhammaan agabkii, dawadii, dhakhaatiirtii iyo hawlwadeennadii looga baahnaa. Sida ay qireen Wasiirrada Caafimaadka ee dunidu, mar ay shirk u yeesheen magaalada Addis Ababa, dhammaadkii bishii Obtober 2009, dalalka Afrika (ee Somaliland ku jirto) kumanyaal hooyooyin ah ayaa u dhinta fool-raac iyo xanuuno dumarka haleelo xilliga ay uurka leeyihiin. Iyada oo Qaramada Midawday tabarrucday lacag tiro badan oo arrimahaas wax lagaga qabanayo, ayaa Xisiga UCID ay ka go'an tahay in uu yareeyo cudurrada faafa (communicable/infectious diseases), isla markaana wax ka qabto hooyooyinka ummul-

raaca iyada oo laga faa'idaysanayyo oo si wanaagsan loo maaraynayo lacagaha tirade badan ee ay caafimaadka ku bixiyaan dalalka dunidu.

- **Aasaaska hay'adda Kahortagga Cudurrada Faafa:**
  Waxa aannu qaabayn doonnaa hay'ad la yidhaahdo Hay'adda Kahortagga Cudurrada Faafa (Somaliland National Agency against Contagious Diseases). Hay'addani waxay ka shaqayn doontaa kahortagga cudurrada faafa, sida HIV/AIDS, TB, Hepatisis, jabtida, Xabadda iwm. Xisbiga UCID waxa uu aad uga werwersan yahay sida ba'an ee cudurradan kor ku xusani u faafayaan. Sidaa daraaddeed, waxa naga go'an sidii aannu olole caafimaad oo hor leh ugala hortegi lahayn cudurradaas iyo sidoo kale sidii loo deraaseyey xannuunada u badan ee bulshada waayahan danbe asiiba, iyo waxyaabaha xal waxtar leh u noqon kara.

- Aasaaska xarunta cilmibaadhista caafimaadka qaranka (National Health Research Insititute) Xaruntani waxa ay si dhow ula shaqeyn doontaa wasaaradda Caafimaadka qaranka si ay ugu qaabilsanaato wixii cilmibaadhis ah eek u saabsan caafimaadka iyo xanuunnada dalka.

**Caafimaadka Xoolaha**

Maaddaama xooluhu ay yihiin lafdhabarta dhaqaalaha waddanka, waxa aannu xoojinaynaa daryeelka iyo xanaannaynta xoolaha nool, iyada oo aannu xoogga saarayno hubinta caafimaadkooda (certification), tayaynta xoolaha iyo horumarinta nafadadooda.

Xisbiga UCID waxa uu xoojinayaa maxjarrada haatan jira, isaga oo samayn doona maxjarro hor leh iyo hoy dhexe oo lagu baadho nolosha iyo caafimaadka xoolaha, isla markaana lagu derso sidii xoolaheenna loo horumarin lahaa. Sidoo kale, waxa uu Xisbigu samayn doonaa bangi[3] u gaar ah horumarinta xoolaha iyo khayraadka badda.

Sida ku xusan barnaamijka deegaanka iyo dhaqaalaha ee buuggan, Xukuumadda UCID waxa ay ballanqaadaysaa in Seerayaashii dawladda la soo celin doono, si loo xaqiijiyo caafimaadka

[3] Waxa la abuuri doonaa Bangiga Horumarinta Xoolaha, Beeraha iyo Khayraadka Badda; kaas oo ka shaqayn doona kobcinta waxsoosaarka xoolaha, beeraha iyo khayraadka badda ku jira. Faahfaahinta bangigani waxay ku qeexan tahay qodobka 3.1.3 ee Kobcinta Dhaqaalaha

xoolahana, waxa UCID ka go'an in seerayaash laga dhex sameeyo xarumo xannaanaynta iyo ilaalinta caafimaadka xoolaha u gaar ah.

Sidoo kale xukuumadda UCID waxay samayn doontaa maxjarro (holding grounds) ka hor inta aan xoolaha la geyn dekadda laga dhoofinayo.

Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa in la ballaadhiyo xarumaha aqoonta xannaanaynta xoolaha lagu barto taas oo uu si gaar ah u gaadhsiin doono dugsiyada xannaanada xoolaha deegaannada xoolo dhaqatada.

Xukuumadda UCID iyaga oo ogsoon doorka xoolaha ee dhaqaalaha waddanka, waxa uu qaabayn iyo qorshe u samayn doonaa nidaamka dhoofinta xoolaha ka hor inta aan loo gudbin maxjarrada.

**Ilaalinta Tayada Badeecadaha**

Waxaannu tayeyn doonnaa hay'ad hubisa tayada badeecadaha dalka soo gelaya iyo dalka lagu sameeyaba, sida cuntada, dawooyinka dadka, xoolaha iyo dhirta (Quality Control Commission). Xisbiga UCID waxa uu aaminsan yahay in caafimaadka dadka, xoolaha iyo deegaanka Somaliland khatar ku jiro haatan, maaddaama aanay jirin cid hubisa waxyaabaha la cuno, ama la isticmaalo ee dalkeenna soo gala. Sidaa daraaddeed, si loo ilaaliyo fayoobidda dadka, xoolaha, dhirta iyo deegaanka dalka, waxa si nidaamsan loo baadhi doonaa tayada dhammaan waxyaabaha la soo dejiyo iyo kuwa lagu farsameeyo dalka gudihiisa.

**Xoojinta Tayada Waaxda Fayadhawrka iyo Nadaafadda**

Waaxdani waxay ka shaqaynaysaa nadaafadda guud iyo fayadhawrka dalka. Waxa ay xakamayn doontaa wixii waxyeelo u geysanaya bay'ada guud (sida qashinka, bullaacadaha, iwm).

Maaddaama nolosha iyo caafimaadkuba ku xidhan yihiin nadaafadda iyo fayadhawrka, Xisbiga UCID waxa uu dejin doonaa siyaasad wax-ku-ool ah oo waaxdan lagu tayaynayo, isla markaana dib loogu soo noolaynayo hawlihii waaxdani qaranka u hayn jirtay. Waxaana waaxdani la wada shaqayn doontaa Wasaaradda Caafimaadka, Dawladaha Hoose, ururrada bulshada iyo guddiyada dadweynaha.

## CUTUBKA LIXAAD: WAXBARASHADA

Sida ku cad mabaaddi'da Xisbiga UCID iyo dastuurka qaranka **qodobkiisa 15aad, farqadaha 1, 2, iyo 3,** waxa naga go'an horumarinta iyo xoojinta waxbarashada dalka Somaliland. Waxa aannu gelinaynaa 17% miisaaniyadda dalka adeegyada waxbarasho ee waddanka, annaga oo waxbarashada dalka muddo kooban gudaheed ku samaynayna kor-u-qaadis iyo horumarin laxaad leh, isla markaana gaadhsiinayna heerarka ay joogto waxbarashada dalalka horumarka sameeyay.

Xisbigu waxa uu ku dhaqaaqi doonaa in ilmo kasta oo reer Somaliland ah loo helo waxbarasho, isla markaana qasab laga dhigo waxbarashada ilaa heerka hoose/dhexe ee fasallada siddeedaad isla markaana kor loo qaado tayada waxbarasho. Xisbugu wuxuu u taagan yahay sidii loo hirgelin lahaa waxbarasho ka soo jeedda dhaqanka diinta Islaamka, taas oo qofka dhinaca Islaam ahaan, iyo qof ahaaneedba; ka dhigaysa mid horumarsan oo aqoon u leh nolosha fiican iyo habka fiican ee loola noolaado mujtamaca xaqoodana lagu ilaaliyo, laguna guto waajibka qof kasta saaran. Waxa aannu hirgelinaynaa waxbarasho ku salaysan waxsoosaarka iyo tiknoolajiyadda cusub.

Conditional cash transfer (CCT) – Child benefit for the poor people for amount of 5-30$ per child per month.

Waxa la kala saari doonaa dugsiyada wiilasha iyo gabdhaha, waxaana si siman wax loo bari doonaa wiilasha iyo gabdhaha.?

Xisbiga UCID waxa uu xoogga saari doonaa in barbaarinta carruurta lagu soo daro nidaamka waxbarasho ee dawlaiga ah (Kindergarten) oo lagu barayo dhaqanka suubban iyo diinta.

Si loo helo waxbarasho tayo leh oo dalka oo dhan wada gaadha, isla markaana soo saarta jiil caqiido Islaamiya leh, aqoon iyo xirfad sarraysana ku dheehan tahay, isla markaana garaad ahaan iyo ruux ahaanba dhisan (morals and values), waxa aannu qaadi doonnaa tallaabooyinkan soo socda:

**Wax-ka-beddelka iyo kaabidda nidaamka waxbarasho ee dalka**

Waxa aannu wax-ka-beddel ballaadhan ku samayn doonnaa manhajka waxbarasho ee dalka, kaas oo lagu salayn doono diinta, dhaqanka iyo himilada horumarineed ee dalka Jamhuuriyadda Somaliland. Sidoo kale, waxa aannu dib-u-habayn farsamo ku samaynaynaa qaab-dhismeedka iyo mas'uuliyadaha xafiiska manaahijta iyo imtixaannada qaranka (Somaliland National Curriculum, Examination and Certification Board).

Waxa aannu sidoo kale dib-u-habayn weyn ku samaynaynaa guud ahaan nidaamka waxbarasho ee dalka si loo helo waxbarasho iyo tarbiyayn isku xidhan, tayo leh, isla markaana dhiirrigelinaysa hor-u-socod laxaad leh oo qaran. Sidoo kale, waxa aannu xoogga saaraynaa aqoonta Af Soomaaliga iyo suugaanta, taas oo lagu xoojin doono dhammaan ardayda dalka wax ku barata heer kasta oo ay yihiin, si dhaqankooda iyo hiddahoodaba ay aqoon ugu yeeshaan.

**Nidaaminta Hay'adaha Waxbarasho ee dalka:**

1. Waxa aannu ka dhigayna iskuullada dawladda lacag la'aan ilaa heer dugsi sare, iyada oo aannu balanqaadayno in gobol kastaa helo waxbarasho ka wanaagsan tan haatan jirta.
2. Xisbiga UCID waxa uu xoojinayaa tababbarka macallimiinta heer kasta oo ay yihiin.

3. Xisbiga UCID waxa uu Wasaaradda Waxbarashada ee haatan jirta u beddelayaa Wasaaradda Waxbarashada, barbaarinta, Tacliinta Sare iyo Cilmibaadhista, taas oo hagi doonta siyaasadda waxbarashada ee dalka. Xisbiga UCID waxa uu jaamacahada iyo tacliinta sare ee waddanka ka jira u fidinayaa taageero dhaqaale oo ay ku sameeyaan cilmibaadhisyo. Waxa aannu dhiirrigelinaynaa jaamacado iyo xaruumo cilmibaadhiseed oo xor ah.

4. , Waxa uu Xisbiga UCID si weyn xoogga u saarayaa samaynta kulliyado iyo machadyo farsamo, iyo mihnadeed, oo ay waxa ka bartaan 75% ardayda ka soo baxa dugsiyada sare si kor loogu qaado xirfadaha iyo shaqo abuurka dalka. Sidoo kale xukuumadda UCID waxa ay dhiirrigelin doontaa dugsiyada farsamada iyo mihnadaha.

5. Xisbiga UCID waxa uu qorshaynayaa tirada iyo tayada xirfadda iyo aqoonta dalku u baahan yahay, iyada oo la dhiirrigelin doono soo saarista aqoonyahiniin muwaaddiniin ah oo ku kala takhusasay caafimaadka, dhaqaalaha iyo ganacsiga, aqoonta IT-ga ee casriga ah, culuumta khayraadka iyo beeraha culuumta shareecada iyo taariikhda Islaamka, iwm.

6. Xukuumadda xisbiga UCID waxa ay tayeyn doontaa tacliinta sare iyo jaamacadaha. UCID waxa ay ballanqaadaysaa ururinta (Mergin Universities) jaamacadaha isla markaan ay ku soo koobi doontaa tiro kooban oo tayo leh.

7. Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa in dadka baahiyaha gaarka ah leh loo abuuro manhaj waxbarasho oo ku habboon isla markaana la siiyo fursado ay dadkaasi kaga faa'idaystaan.

Quota for shaqada disable

8. Xukuumadda UCID waxa ay siyaasad cad ka yeelan doontaa manaahijta tirada badane ee dalka lagu barto.

9. Xukuumadda xisbiga UCID waxa ay samayn doontaa deeqo waxbarasho oo heer qaran kuwaas oo lagu dhiirrigeliyo ardayda keena dhibcaha sare, kuwa ka soo jeeda beelaha la haybsooco iyo ardayda leh baahiyaha gaarka ah.

10. UCID waxa ay ballanqaadaysaa baahinta waxbarashada ee ilaa heer dugsi sare dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalka.

## CUTUBKA TODDOBAAD: DAWLADAHA HOOSE, CAASMIDDA IYO DHULKA

**Dawladaha hoose**

Dawladaha hoose waa aasaaska iyo saldhigga maamul daadjinta. Maamul daadejintu waa awood siinta maamul ee dawladda dhexe u daadejiso dawladaha hoose si adeegyada aasaasiga ah ay ugu qabtaan shacabka. Xukuumadda xisbiga UCID waxa ay ogsoontahay in maamul daadejintu tahay qayb wayn oo ka mid ah maamul wanaagga iyo in shacabka JSL helaan adeegyada aasaasiga ah sida biyaha, korontada, waxbarashada iwm.

They will be accountable for their parties,

Dib u eegis habka dowladaha hoose iyo shuruucdooda

Dawladaha hoose dalku waxa ay si buuxda ugu adeegi doonaan shacabka, waxa ay dhismaha dawladaha hoose ee casriga ah ka hirgelin doonaan magaalooyinka dalka. Kuwaas oo xaafad walba iyo degmo waliba ay yeelan doonto maamul aan magac u yaal ahayn ee masiirka xaafadda iyo baahiyaha degmooyinka qayb libaax ka qaata.

**Maamul daadejinta**

Xukuumadda UCID waxa ay si qorsheysan u hirgelin doontaa maamul daadejin wada gaadha dadka oo dhan si degmo walba, magaalo walba iyo gobol walba ugu madax bannaanaado adeegyada dawliga ah. Taas oo Xukuumadda UCID ay yarayn doonto baahida shacabku u baahdaan magaalo madaxda marka ay noqoto adeeg dawli ah.

Waxa aannu kalsooni buuxda siin doonnaa, dad aqoon maamul, hoggaamineed iyo karti lehna u xulan doonnaa masuuliyiinta degmooyinka iyo magaalooyinka dalka sida maayarrada, ku xigeennada, xoghayeyaasha fulinta iwm.

Xukuumadda UCID waxa ay isku soo ururin doontaa tuulooyinka tirade badan ee u dhexeeya magaalooyinka, waxana ay ku kulmin doontaa hal degmo oo wayn si adeegyada dawliga ahi u wada gaadhaan shacabka reer Somaliland iyo si isdhexgalka bulshadu kor ugu kaco oo qaybsanaanta loo yareeyo.

**Caasimadda**

Xisbiga UCID waxa uu aaminsanyahay in caasimadda dalku tahay muraayadda qarankan ictiraaf doonka ah muddada dheer. Waxa aannu aaminsannahay in bilicda iyo qaab dhismeedka caasimaddu qayb laxaad leh ka qaadan karo iibinta qaddiyadda qarankan muujinna karo awooddeenna iyo kartideenna maamul maadaamaa ay tahay meesha indhaha caalamka iyo martida innoo timaaddaa ku soo hagaagaan.

Xukuumadda UCID waxa ay aaminsantahay in casaamidda Hargeysa shacabku intoodii ku aaddanayd ee maalgelin dhisme iyo sarooyin ah ba door weyn ka ciyaareen laakiin ay intii badnayd ee dawladdu ka masuulka ahayd wax aad u badan laga tebayo sida, waddooyin tayo leh, bilicda, nadaafadda, suuqyada iyo sariibadaha, xadeynta caasimadda (township).

Xukuumadda UCID waxa ay ballanqaadaysaa in caasimadda ay mudnaanta koowaad siiso sidii ay u noqol lahayd mid soo jiidata indhaha caalamka, u adeegta dadweynaha ku dhaqan, isla markaana la jaanqaadda hab-dhismeedka iyo maamulka caasimadaha dunida.

Waxa ay xukuumadda UCID meel marin doontaa xeerka caasmidda.

**Dhulka**

Dhulku waa mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee haysta muwaadiniinta reer Somaliland. Lahaanshiiyaha dhulka intiisa badan waxa uu gacanta u galay shacabka, oo in badan oo ka mid ahi ka dhigteen hanti laga ganacsado taas oo keentay in dhulku meelaha qaara sida (Hargeysa) uu noqdo mid ka mid ah kuwa adduunka ugu qaalisan, taas oo ah wax laga naxo.

Xukuumadda UCID waxa ay soo celin doontaa lahaanshihii iyo gacan ku hayntii dhulka ee dawladda, si looga baxo caqabadan, taas oo ay jaangoyn doonto qiimeyaasha dhulka ee aagagga isla markaana ay ku soo rogi doonto cashuuro dhammaan dhulka iska bannaan ee aan dhisme iyo adeeg kale midna qaban.

Xukuumadda UCID waxa ay muwaadiniinta u ballanqaadaysaa in dawladdu siiso qof wal oo reer Somaliland ah buqcad uu dhisto marka uu diyaar u yahay haddii la xaqiijiyo in uu yahay qof u baahan.

Hantida ummadda ka dhaxeysa ee danta guud ah xukuumadda UCID waxa ka go’an in ay noqoto mid ilaashan si jiilasha dambe ay u helaan goobo ciyaareed, kulammeed, waxbarasheed iwm.

## CUTUBKA SIDDEEDAAD: ADEEGGA BULSHADA (SOCIAL SEVICES)

### SIYAASADDA BIYAHA EE XISBIGA UCID

Somaliland dad aad u tiro yar ayaa cabba biyo nadiif ah, isla markaana si toos ah u hela. Xisbigu waxa uu dib-u-habayn ku samaynayaa maamulka iyo maaraynta xarumaha biyaha, waxaanu ka dhigayaa hay’ad ay wada maalgashadaan dawladda iyo dadweynuhu (PPP).

Waxa aannu dib-u-eegis buuxda ku samaynaynaa xogaha dhabta ah ee ku wajahan biyaha dalka, si loo xoojiyo adeegyada biyaha ee hadda jira, loona sahamiyo hab-biyood ballaadhan oo gaadha miyi iyo magaalaba.

Si taasi u suurtagasho, waxa aannu dhisi doonnaa hay’adda Horumarinta Biyaha Somaliland, taas oo ka shaqaysa samaynta biya-qabatinno, ceelbiyoodyi dhaadheer iyo kuwo gaaggaabanba (water sources). Sidoo kale waxay hay’addani dayactir joogto ah iyo ballaadhin ku samaynaysaa ceelasha biyaha ee hadda jira.

### SIYAASADDA KORONTADA EE XISBIGA UCID

Waxa aannu ballanqaadaynaa in aannu xoojinno tamarta korontada si miyi iyo magaaladaba loo helo koronto ku filan lehna qiimo jaban. Taas oo muhiim u ah horumarinta dhaqaale iyo wershadaynta dalka. Xisbigu waxa uu abuuri doonaa ilo cusub oo laga sameeyo tamarta korontada, sida dabaysha, cadceedda, iwm. Waxa aannu midayn doonnaa siyaasadda maamulka korontada dalka, si dalka oo dhan loo gaadhsiiyo koronto. Taas oo dawladda iyo dadweynuhu iska kaashan doonaan. Waxaanay arrintaasi wax weyn ka tari doontaa wershadaynta waddanka.

### DARYEELKA BULSHADA

Sida ka muuqata magaca Xisbiga UCID, waxa aannu ballanqaadaynaa sidii qaranka JSL u noqon lahaa qaran daryeela dadkiisa jilicsan. Waxa aannu ku dhaqaaqaynaa siyaasaddii suurtagelin lahayd in caddaaladda, adeegyada bulshada iyo daryeelka la gaadhsiiyo muwaaddiniinta.

#### Daryeelka Naafada, Agoomaha iyo Dadka Da’da ah

Waxa aannu ballanqaadaynaa in aannu daryeelno naafada, agoomaha iyo dadka da’da ah ee reer Somaliland, wixii awooddu saamaxdo; siiba naafada iyo agoomihii halgamayaashii SNM. Si

taasi u suurtagashana, waxa aannu xoojin iyo taageero xoog leh oo maaliyadeed iyo farsamo u fidinaynaa Jimciyadda Mujaahidiinta SNM ee SOOYAAL.

Waxa kale oo aannu ku dhaqaaqaynaa sidii taariikhdii halgamayaashii reer Somaliland oo dhan sida Daraawiishtii, SNM iyo kuwa kaleba si loo sugi lahaa, looguna dari lahaa manhajka waxbarasho ee dalka, isla markaana goobo xasuuseed loogu samayn lahaa. (MALA XAGA WAXBARASHADA AYAY KU FIICANTAHAY PARAGARAPHKAN)

Dhinaca kale, mas’uuliyadaha xukuumadda UCID waxa ka mid noqon doona daryeelka dadkeeda, gaar ahaan kuwa baahiyaha khaaska ah leh, sida dadka da’da ah ee aan cid daryeesha lahayn iyo naafada.

Xisbiga UCID waxa uu waxqabad toos ah u fidinayaa dadka naafada ah, nooc kasta oo ay yihiin, isaga oo ka caawinaya dhinacyada waxbarashada, caafimaadka, iyo shaqaalaynta. Waxa kale oo Xisbigu uu naafada siin doonaa kaalin cuddoon oo maamul, isaga oo wax-ka-beddel ku samaynaya dhammaan xeerarka[4] iyo shuruucda caqabadaha ku ah horumarka iyo dhiirrigelinta naafada.

Xisbiga UCID waxa uu sida oo kale si gaar ah u dhaqaalayn doonaa dadka tamarta gabay, ama da’da ah.

**Horumarinta Dhallinyarada (Gabdho iyo Wiilal)**

Waxaannu aaminsannahay in dhallinyaradu tahay mustaqbalka iyo lafdhabarta jiritaanka iyo horumarka Somaliland, iyaga oo ah quwadda ugu weyn ee samayn karta isbeddel wax-ku-ool ah.

Waxa aannu ballanqaadaynaa in ay heelaan dhallinyaradu barnaamijyo horumarineed oo u diyaar-garaynaya in ay hantaan hoggaanka siyaasadda ee dalka. Si ay taasi u suutagasho, waxa uu Xisbiga UCID ka taakulayn doonaa dhaqaalaha, farsamada iyo in ay aqoon sare helaan.

[4] Waxa aannu meesha ka saari doonnaa qodobka odhanaya in qofku si uu u shaqo geli karo uu jidh ahaan dhammaystiran yahay.

Xisbiga UCID waxa ka go'an oo uu ballanqaadayaa in dhallinyarada dalka laga qaybgeliyo hannaanka siyaasadda iyo golayaasha go'aan-qaadashada dalka, iyada oo caqliga iyo cududda dihin ee da'yarta lagu xoojin doono hay'adaha xukuumadda. Waxa sidoo kale dhallinyarada laga qaybgelin doonaa Golaha Wasiirrada ee xukuumadda UCID.

Waxa aannu. Sida daraaddeed, ku dedaalaynaa sidii ay dhallinyaradu u noqon lahayd quwadda lagu dhaqaajiyo horumarka iyo taabbagelinta qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Wuxuu Xisbigu horumarin ku samayn doonaa ciyaaraha dalka, iyada oo la curin doono siyaasad ballaadhan oo ciyaaraha kala duwan ee dhallinyarada lagu adkaynayo. Waxaana lala kaashan doonaa khubaro muwaaddiniin ah oo arrintaa wax ka yaqaana. Xisbigu waxa uu dayactiri doonaa garoomada ciyaaraha ee haatan jira, iyada oo qaar cusubna la dhisi doono. Muddada shanta sano ah waxa gobol kasta laga dhisi doonaa garoomo waaweyn oo isugu jira noocyada kala geddisan, yo sidoo kale kuwo yaryar.

UCID waxa uu xirfado u abuurayaa dhallinyarada iskuullada dibadda ka joogta, waxaana loo samaynayaa xirfado ay ku shaqaystaan. Xisbigu waxa uu mudnaanta siin doonaa fursadaha shaqo dhallinyarada waddanka.

Xisbogu waxa dhallinyarada u samaynayaa xarumo cilmi iyo bulsho (community centers), kuwaas oo ay kaga maarmaan balwadaha; wuxuuna si gaar ah u gacanqaban doonaa ururrada dhallinyara.

Waxa aannu ballanqaadaynaa in aannu dhiirrigelinno guurka dhallinyara, annaga oo ka saacidi donna dhinacyada dhaqaalaha, farsamada iyo abaabulka; isla markaana sannad kasta gobol kasta ka agaasimi donna aroos-wadareedyo waafaqsan diinteenna iyo dhaqankeenna.

Xisbiga UCID waxa uu dib-u-nidaamin iyo siyaasad shaqo u samayn doonaa ururrada dhallinyara, si uu waxtarkoodu u sugmo, isla markaana ay qayb uga noqdaan dedaalka horumarineed ee qarankan. Sida UCID haatan ugu tamariyo awoodda dhallinyarada ayaa dawladda UCIDna ku tamarin doontaa cududda iyo caqliga dhallinyada dalkeenna.

**Kobcinta iyo Daryeelka Haweenka JSL**

Waxa xaqiiqo lamadhaafaana ah in haweenku yahay aasaaska bulsho kasta. Sidaa darteed, Xisbiga UCID waxa uu garawsan yahay, oo aaminsan yahay, in haweenka Somaliland yihiin

halbawlaha nolosha iyo nabadda Somaliland ka jirta, ee ay horana qaybta ugu weyn uga soo qaateen nabadaynta iyo horumarinta dalka.

Sidaa darteed, Xisbigu waxa uu ahmiyad u qalanta siin donaa ururrada haweenka ee heer walba, si loo sii kordhiyo waxqabadka ay u hayaan dalka. Waxa kale oo Xisbigu xoogga saarayaa xirfadaha shaqo iyo baayacmushtar ee haweenka u gaarka ah. Xisbigu waxa uu haweenka u samaynayaa xarumo iyo naadiyo cilmi iyo bulsho u gaar ah oo ay hawlahooda ku qabsadaan. Xisbiga UCID waxa uu warbaahinta qaranka uga faa'idaysan doonaa sidii loo waxgelin lahaa, jihayn lahaa, isla markaana wax loo bari lahaa haweenka iyo carruurta guryaha ku sugan.

Xisbigu waxa uu si gaar ah u korinayaa kaalinta haweenku kaga jiraan siyaasadda, shaqada, maamulka iyo waxbarashada. Si taas loo helana, waxa aannu haweenka kaalin mug leh ka siin doonnaa maamulka dalka, sida golayaasha xukuumadda, deegaanka, gobollada iyo guddiyada dalka. Waxa aannu aaminsannahay in haddii garaadka, aqoonta, iyo fekerka haweenka la kobciyo, la heli karo bulsho toosan oo ka soo jeedda qoysas wanaagsan, una dhisan ruux ahaan iyo aqoon ahaanba (morally and intellectually). Sidaa daraaddeed, Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa in uu dejiyo siyaasad dhammaystiran oo daryeelka iyo horumarinta haweenka JSL lagu suurtageliyo.

Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa in uu la yimaaddo qorshe shan sannadood gudahood kaalmo dhaqaale oo waxtar leh loogu fidinayo haweenka waddooyinka fadhiya ee iibiya qaadka, shaaha, iyo kuwa caanaha la wareega oo iyaga la dersi doono hab ka casriyaysan kana fudud kan ay haatan caanaha ku iibiyaan. Haweenkaasi guud ahaan waxay biiliyaan carruurta ay dhaleen oo agoon ah, ama aabbahood gabay kaalintiisii. Qorshahani waxa uu xaqiijin doonaa muddo shan sano gudahood ah in la waayo gabadh reer Somaliland ah oo iyada oo u xoogsanaysa carruurteeda qaad waddada ku iibinaysa. Waxa isla markaas suurtageli doonta in haweenkaasi ka ganacsadaan waxyaabo kale si ay uga helaan noloshooda (small scale businesses/investment).

**Daryeelka iyo Horumarinta Dadka la Haybsooco**

Bulshada Somaliland waxa heeryo culus ku ah hab-dhaqanka lagu kaco dadyawga la haybsooco. Waxaannu aaminsannahay in loo baahan yahay isbeddel fikri ah oo xiddidada loogu siibayo aafadan bashariga ah ee lagula dhaqmayo dad innaga mid ah. Sidaa darteed, Xisbiga UCID waxa uu samaynayaa xeerar wax lagaga qabanayo nooc kasta oo haybsooc ah. Waxa Xisbigu xoogga

saarayaa sidii kor loogu qaadi lahaa taageerrada dhinacyada waxbarashada, shaqaalaynta iyo ka-qaybgelinta talada waddanka.

Xisbiga UCID waxa uu bulshada la haybsooco ka qaybgelin doonaa golaha xukuumadda, ilee heer wasiir. Dhinaca kalana, waxa aannu sami ka siinaynaa dhammaan guddiyada dalka, sida xafiisyada maamulka gobollada iyo hay;adaha kale ee dawladda. Waxa aannu ku dhaqaaqaynaa sidii bulshadan looga qaybgelin lahaa dhammaan dhinacyada talada dalka. Hay'ad kasta oo xukuumadeed waxaannu ka siin doonnaa saami, iyaga oo qaybtooda ku yeelan doona shaqaalaha dawladda. Dhinaca kale, waxa aannu maalgelin iyo dhiirrigelin weynba la garab istaagi doonnaa iskaashatooyin iyo shirkado farsamo oo loo sameeyo bulshadan, ayna ku soo saaraan xirfaddooda iyo waxsoosaarkooda ay aqoonta u leeyihiin; si looga maarmo alaabta dibadda laga soo waarido.

Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa in uu deeq waxbarasho oo gaar ah siiyo bulshadan, taas oo taxan heer dugsi hoose ilaa heer jaamacadeed iyo takhasusyo saraba.

Waxa aannu sidoo kale dib-u-dhis iyo adeeg bulsho oo weyn ku samayn doonnaa dhammaan deegaamada ay degaan bulshadani, annaga oo siin doonna waxbarasho iyo wacyigelin dheeri ah, taas oo lagaga raaridayo xuquuqdooda buuxda iyo sidii ay horumar buuxa u hiigsan lahaayeen.

## CUTUBKA SAGAALAAD: SIYAASADDA ARRIMAHA DIBADDA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA AH

Xisbiga UCID waxa ka go’an, oo uu ballanqaadayaa, in uu dalka ku hago siyaasad arrimo dibadeed oo furfuran, isla markaana la jaanqaadi karta qiyamka ummadda, horumarinta dalka, iyo xidhiidhka bulshada caalamka, oo waafaqsan dastuurka qaranka **qodobkiisa 10aad**.

Siyaasadda dibadda ee Xisbiga UCID waxay ku salaysan tahay wax wada-qabsi, sinnaan, iyo isfaragelin-la’aan.

- Xisbiga UCID waxa uu hirgelin doonaa siyaasad dibadeed oo qeexan, khaas ahaan siyaasad ictiraaf-raadineed (road-map) oo jeexi doonta jidkii looga midha-dhalin lahaa aqoonsi buuxa oo dalkani gaadho.
- Xukuumadda Xisbiga UCID waxay xoojin doontaa xidhiidhka iyo iskaashiga dawladaha Geeska, Bariga Afrika iyo guud ahaan qaaradda Afrika.
- Xukuumadda UCID waxay xoojin doontaa siyasadda iskaashiga iyo xidhiidhka dunida Carabta iyo waddamada Ismaalka ah.
- Waxa hubaal ah in aan si dhab ah looga hawlgelin abaabulka qurbajoogta Somaliland. Xisbiga UCID waxa uu xoojin doonaa abaabulka qurbojoogta si ay qayb laxaad leh uga qaataan ictiraaf raadinta dalka.
- Xisbiga UCID waxa uu xoogga saari doonaa waddamo gaar ah, oo aannu aaminsannahay in ay si weyn u rymaysan yihiin in Somaliland la ictiraafo.
- Xukuumadda UCID waxa ay dib u soo celin doontaa xidhiidho hore oo waddankani u lahaa oo lumay, adkayntoodana aan laga hawlgelin.
- Xukuumadda UCID waxa ay si khaas uga ololayn doontaa waddamada Barwaaqa-sooranka (Common Wealth Countries), oo horaba Xisbigu xidhiidh xooggan ula lahaa.
- Xukuumadda UCID waxay ka dabategi doontaa warbixintii ururka Afrika (AU) ka qoreen dalkeenna Somaliland sannadkii 2005tii. Warbixintaas oo ka maragkacday in Somaliland ay xaq u leedahay in aqoonsi buuxa la siiyo.

- Xukuumadda UCID waxa ay ka hawlgelaysaa diblomaasiyiin iyo hoggaamiyayaal caalami ah oo u hawlgeli doono sidii waddankani u heli lahaa xaqa uu u leeyahay in ka mid noqdo bulshada caalamka, oo helo aqoonsi buuxa.
- Xukuumadda xisbiga UCID waxa ay sii wadi doontaa, qorshe cusubna u samayn doontaa wadahadallada u dhaxeeya Jamhuuriyadda Somaliland iyo dawladda Soomaliya si looga xaqiijiyo himilada goonni isu-taagga Jamhuuriyadda Somaliland.
- Xukuumadda xisbiga UCID waxa ay si gaar ah qaddiyadda madaxbannaanida dalka uga dhex ololeyn doontaa xisbiyada ka tirsan Socialist International oo xisbiga UCID ka yahay xubin. Waxa kale oo xukuumadda UCID u fidin doontaa marti-qaad in shirweynayaasha Socialist International lagu qabto Somaliland si loo arko horumarka iyo nabadda Somaliland ay samaysay.
- In la xoojiyo siyaasadda arrimaha gudaha ee xidhiidhka la leh siyaasadda arrimaha dibedda sida amniga, caddaaladda, xorriyatul qawlka, dimuquraaddiyadda, sarreynta sharciga iwm.
- Xukuumadda UCID waxa ay tayeyn doontaa aqoonta, xirfadaha iyo kartida hawlwadeennada wasaaradda arrimaha dibadda iyo safaaradaha.
- UCID waxa uu ballanqaadayaa in dib u habayn lagu sameeyo guddida Ictiraaf raadinta loona dejiyo miisaaniyad ay si gaar ah ugu hawlgalaan.

## CUTUBKA TOBNAAD: SIYAASADDA DEEGAANKA IYO DALXIISKA

UCID waxa ka go'an ilaalinta iyo daryeelka deegaanka, waxaana uu nidaamin doonaa dhul-daaqsimeedka waddanka, iyada oo la dejinayo barnaamijyo deegaanka lagu dhawrayo, oo ku dhisan aragti iyo qorshe bulshadu ku midaysan tahay.

Somaliland waa dal ka kooban buuro, bad, oogo, iyo dhul hawd ah oo daaqsimeed. Hasayeeshee dadku weli way ka qatan yihiin nimcooyinka dhulkooda iyo baddooda ku duugan iyo ka faa'idaysiga deegaanka Ilaahay ku mannaystay. Haddaba, *deegaan* waxa uu Xisbigu ku micnaynayaa "waxa dadku ku nool yahay" sida biyaha, dhulka dushiisa waxa yaalla (flora and fauna), hawda, buuraha, iyo wadajirka ama iskutiirsanaanta noolaha iyo manoolaha (ecosystem).

Xisbiga UCID waxa uu si dhammaystiran u joojin doonaa jarista dhirta, iyo joojinta waxyaabaha deegaanka nabaad-guuriya. Taa beddelkeeda, waxa uu Xisbigu abuurayaa aqoon xirfadeed lagu beddelo xaabada iyo dhuxusha, sida dhuxul-dhagaxda, gaasta dabiiciga ah iwm. Inta laga helayo hannaan lagu beddelo xaabada iyo dhuxusha, waxa uu Xisbiogu samayn doonaa dhirbeeris iyo kayd loo isticmaalo dheri-karinta. Waxa kale oo Xisbigu uu dhiirrigelin doonaa dhirbeeris-wadareed. Sannad kasta hay'adaha arrimaha deegaanka khuseeya ee xukuumadda UCID waxay beerayaan ilaa 20 000 (labaatan kun) oo geed, oo lagu kala beerayo gobollada dalka oo dhan; iyada oo la soo celin doono dhammaan dhirtii qaaliga ahayd ee waddanka ka bixi jirtay, balse haatan sii dabargo'aysa. Dhir-beeristan waxa lagu tartansiin doonaa gobollada, degmooyinka, magaalooyinka iyo tuulooyinka dalka.

Waxa aannu ballanqaadaynaa in aannu la iman doonno siyaasaddii iyo qorshihii lagu soo celin lahaa baadkii, dooggii iyo kaymihii dalku lahaa, si looga hortago xaalufka iyo nabaadguurka; waxaana laga shaqayn doonaa sidii roobka iyo biyahan dalka loo qaban lahaa, lagana hortegi lahaa biyahaasi ku qulqulaan badda, kuwaas oo keena carraguur, biya-la'aan iyo in abaaro soo noqnoqdaan.

Waxa kale oo aannu ku dedaalaynaa dib-u-soo-celinta ugaadha iyo duurjoogta, taas oo loo samayn doono seero lagu ilaaliyo ugaadha iyo kaymo u gaar ah (conservation).

Xisbiga UCID waxa uu ka qaybqaadan doonaa barnaamijyada ilaalinta deegaanka ee caalamiga ah, isaga oo taageerana u raadinaya mashaariicda ilaalinta deegaanka dalkeenna.

Waxa kale oo uu Xisbigu hirgelinayaa barnaamijyo lagu joojinayo qulqulka ciidda iyo biyaha. Waxa aannu sidoo kale wax ka qaban doonnaa jeexyada iyo boholaha, si looga hortago nabaadguurka deekaanka. Xisbigu waxa uu dib u eegayaa qaab-dhismeedka magaalooyinka, si loo helo magaalooyin dhawra nidaamka iyo siyaasadda u dejisan dhawritaanka deegaanka.

Somaliland weli lama jaangoyn dhulka daaqsinka ah iyo ka beeraha ah, lama maarayn dhulka macdantu ku jirto ee laga soo saari doono iyo dhulka dalxiiska ahba; iyada oo aan la samayn wax taswiir ah ama jaangoyn ah oo lagu sameeyay tuulooyinka ama inta magaalooyinku ku ee kaanayaan sannadka 2050ka. Sidaas daraaddeed, waxa aannu samayn doonaa qorshayn iyo jaangoyn dhammaystiran oo lagu sameeyo oogada dhulka Somaliland (Somaliland land Survey).

Xisbiga UCID waxa uu soo nooleyn doonaa goobaha taariikhiga ah ee dalkani leeyahay sida Jasiiradaha, buuraha, magaalooyinka iyo dhammaan aasaarta qadiimka ah ee faca way nee dalkani leeyahay. Sidoo kale UCID waxa ay ballanqaadaysaa in manaahijta waxbarasho ee dalka ay qayb ka noqdaan deegaannada dalxiisa ee dalku leeyahay iyo taariikhohoodu.

## CUTUBKA KOW IYO TOBNAAAD: SIYAASADDA ARRIMAHA SAXAAFADDA

Saxaafadda noocyadeeda kala duwani waxay nuxur u yihiin nolosha dawladnimo. Xorriyadda saxaafaddu waxay ka mid tahay xorriyadaha aasaasiga ah ee dastuurka Somaliland dammaanadqaaday.

Iyada oo la tixraacayo qawaaniinta ku saabsan warbaahinta ee ku xusan dastuurka iyo xeerarka saxaafadda, ayaa aannu samaynayaa gole saxaafadeed agaamisa isla markaana horumariya saxaafadda waddanka si loo tayeeyo. Waxa golahani uu u taagnaan doonaa arrimahan hoos ku qoran:

- In warbaahinta waddanku noqoto mid ku socota dastuurka iyo xeerarka saxaafadda.
- In ayna marnaba imanin cabbudhin ku timaadda saxafiyiinta, si looga hor istaago waxyaabaha ay xaqa u leeyihiin ee sharciyadda dalku dammaanadqaadday.
- In la helo saxafiyiin tababbar sare leh oo ka tirsan dhinaca warbaahinta dawladdu maamusho iyo tan gaarka loo leeyahayba (public and private media).

Dhinaca kale, waxa aannu isla markaana waxa aannu ballanqaadaynaa in aannu ballaadhinno oo tayayno idaacadda iyo TVga Qaranka, si ay waddanka oo dhan u wada gaadhaan.

Warbaahinta dawladdu (radio, TV and newspaper) waxay guud ahaanba noqon doontaa mid meel keliya laga hago, siyaasad cad oo waddaniyana ku shaqaysa. Warbaahinta dawladda UCID waxay noqon doontaa mid ummadda u tebisa warar degdeg oo sugan, barnaamijyo ku qotoma cilmi, wacyigelin iyo jihayn ummadeed iyo madaddaalo habboon oo waxtar leh.

Xisbiga UCID waxa ka go’an in saxaafadda qaranku u sinnaato muwaaddiniinta iyo xisbiyada qarankaba. Sidaa daraaddeed, waxa aannu soo afjari doonnaa warbaahintii dawladda ee ku salaysnayd rabitaanka iyo hirgelinta danaha gaar ah ee shakhiyaad xukuumadda ka tirsan.